T

DASTUURKA

# THE JUBBALAND STATE OF SOMAL

## TUSMADA


**CUTUBKA 1AAD:Dawlad Goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya 9**

Qodobka 1aad: Aasaaska Dawlad Goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya 9
Qodobka2aad: Sarraynta Sharciga 9
Qodabka3aad:Mabaadi'da aasaasiga ah 9
Qodobka 4aad: Diinta 10
Qodobka 5aad:Dadka 10
Qodobka 6aad:Dhulka iyo xuduudaha 10
Qodobka 7aad:Calanka iyo astaamaha 10
Qodobka 8aad:Caasimadda Dawladda 10
Qodobka 9aad:Afka 11

**CUTUBKA 2AAD:Xuquuqaha iyo Xorriyaadka Aasaasiga ah 12**

Qodobka 10aad: Xaqa nolosha iyo caafimaadka 12
Qodobka 11aad:Xuquuqaha Shakhsiga 12
Qodobka12aad: Xaqa Eedaysanaha 12
Qodobka 13aad: Xurmada Hoyga 13
Qodobka 14 aad: Xorriyadda ka Mid Noqoshada Urur 13
Qodobka 15aad: Xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo codsi wadareedka 14
Qodobka 16aad:Xuquuqda Haweenka 14
Qodobka 17aad:Xuquuqda Carruurta iyo waxbarashada 14
Qodobka 18aad: Mamnuucidda Addoonsiga 15
Qodobka 19aad:Xorriyadda Diinta iyo Caqiidada 15
Qodobka 20aad:Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta 16
Qodobka 21aad:Saxaafadda 16
Qodobka 22aad:Xaqa Matalaadda 16
Qodobka 23aad: Xaqa Lahaanshaha Hantida 16
Qodobka 24aad:Waajibaadka Muwaadinka Reer Jubbaland 17
Qodobka 25aad:Xuquuqda Doorashada 18

**CUTUBKA 3AAD: Nidaamka Xukuumadda Dawlad Goboleedka Jubbaland 19**

Qodobka 26aad:Xukuumadda Dawlad Goboleedka 19
Qodobka 27 aad:LaamahaXukuumadda 19

**GOLAHA BAARLAMAANKA 19**

Qodobka 28aad:Qaab dhismeedka iyo Muddada Barlamaanka Dawlad Goboleedka 19
Qodobka 29aad:Shuruudaha XubinnimadaBaarlamaanka Dawlad Goboleedka Jubbaland. 19
Qodobka 30aad:Sababaha Lagu LuminKaro Xubinnimada BarlamaankaDawlad Goboleedka 20
Qodobka 31aad:Awoodaha iyo Masuuliyaadka Baarlamaanka Dawlad Goboleedka Jubbalan 20
Qodobka 32aad:Xasaanadda Xildhibaannada Baarlamaanka 22
Qodobka 33aad: Kalfadhiyada Baarlamaanka 22
Qodobka 34aad:Kala Diridda Baarlamaanka Dawlad Goboleedka Jubbaland 23
Qodobka 35aad:Kalsooni-kala noqoshada wasiirrada 23
Qodobka 36aad:Xeer Hoosaadka Baarlamaanka Dawlad Goboleedka Jubbaland 23
Qodobka 37aad:Qaabka Xeer Dejinta 25
Qodobka 38aad:Qaabka Muwaadin u soo Gudbiyo Sharci Qabyo Qoraal ah: 25
Qodobka 39aad:Doodaha Hindise Sharciyeedyada Baarlamaanka 25

Qodobka 41aad:Diidmada Qayaxan ee Madaxweynaha 26
Qodobka 42aad:Jebinta Diidmada Qayaxanee Madaxweynaha 26
Qodobka 43aad:Durid Sharci 26

**GOLAHA FULINTA 27**

Qodobka 44aad:Fulinta 27
Qodobka 45aad:Qaab Dhismeedka iyo Shuruudaha Golaha Fulinta 27
Qodobka 46aad:Magacaabista Golaha Wasiirada 27
Qodobka 47aad:Qaab Dhismeedka iyo Waajibaadka Golaha Fulinta ee Jubbaland 28
Qodobka 48aad:Awoodaha iyo Masuuliyaadka Golaha Wasiirrada 28

**GARSOORKA 30**

Qodabka 49aad: Qaab dhismeedka Garsoorka Jubbaland 30
Qodobka 50aad: Awoodaha iyo xilalka Garsoorka 30
Qodobka 51aad: Awoodaha iyo Masuuliyaadka Maxkamadda Sare 30
Qodobka 52aad: Shuruudaha Garsooraha Maxkamadda Sare 32
Qodobka 53aad: Maxkamadda Racfaanka ee Gobollada 32
Qodobka 54aad: Maxkamadaha Derejada kowaad (Degmada & Gobolka) 32
Qodobka 55aad: Maxkamadda Dastuurka Jubbaland 33
Qodobka 56aad: Awoodaha iyo Masuuliyaadka Maxkamadda Dastuurka 33
Qodobk 57aad: Hab-raaca Go'aannada Maxkamadda Dastuurka 33
Qodobka 58aad: Shuruudaha Garsooreyaasha Maxkamadda Dastuurka 34
Qodobka 59aad: Sababaha Lagu Waayi Karo Xubinnimada Maxkammadda Dastuurka 34
Qodobka 60aad: Guddiga Adeegga Garsoorka 34
Qodobka 61aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Guddiga Adeegga Garsoorka 34
Qodobka 62aad: Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubbaland 35
Qodobka 63aad: Shuruudaha iyo Magacaabidda Xeer Ilaaliyaha Guud iyo KuXigeenkiisa 35
Qodobka 64aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud 35
Qodobka 65aad: Awoodaha iyo Masuuliyaadka Kuxigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud 37
Qodobka 66aad: Xil Ka Qaadista Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Ku Xigeenkiisa 37

**CUTUBKA 4aad:Doorashooyinka Dawlad Goboleedka Jubbaland 38**

Qodobka 67aad:Doorashooyinka Guud 38
Qodobka 69aad: Shuruudaha Musharaxa Madaxweynenimada 38
Qodobka 70aad: Muddada Xil Haynta: 38
Qodobka 71aad: Qaabka Doorashada Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Jubbaland Muddada ku meel gaarka ah 39
Qodobka 72aad:Awoodaha iyo Musuuliyaadka Madaxweynaha Jubbaland 39
Qodobka 73aad:Awoodaha iyo Masuuliyaadka Madaxweyne Ku XigeenkaJubbaland 40
Qodobka 74aad:Xil Ka Qaadista Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku Xigeenka 42
Qodobka 75aad:Is CasiliddaMadaxweynaha 42
Qodobka 76aad:Qaabka Dhaarinta Madaxweynaha Jubbaland 43
Qodobka 77aad:Doorashada Afhayeenka iyo Ku Xigeennadiisa 44

**CUTUBKA 5aad: Guddiyada Madaxa Bannaan 45**

Qodobka 78aad: Mabaadi'da Guud 45
Qodobka 79aad:Aasaaska Guddiyada Madaxa Bannaan 45
Qodobka 80aad:Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuququl Insaanka 45
Qodobka 81aad:Guddiga Madaxa Bannaan ee la Dagaallanka Musuqmaasuqa 45

Qodobka 83aad:Guddiga Madaxa Bannaan ee Ciidamada Amniga 46
Qodobka 84aad: Guddiga Madaxa Bannaan ee Nabadda iyo dib u Heshiisiinta 48
Qodobka 85aad:Guddiga Madax Bannaan ee Adeegga Shaqaalaha Rayidka ah 48
Qodobka 86aad: Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuduudaha iyo Doorashooyinka Jubbaland 48

Qodobka 87 aad:Soo Magacaabista Guddiyada Madaxa Bannaan 50
Qodobka 88aad:Qaab Sharciyeedka Guddiyada Madaxa Bannaan 50

**CUTUBKA 6aad: Xafiisyada Madaxa Bannaan 51**

Qodobka 89aad:Xafiiska Hanti Dhawrka Guud ee Jubbaland 51
Qodobka 90aad:Awoodaha iyo Masuuliyaadka Hanti Dhawrka Guud 51
Qodobka 91aad:Bangiga Jubbaland 51
Qodobka 92aad:Ciidamada Amniga ee Jubbaland 52

**CUTUBKA 7aad: XIRIIRKA DAWLADDA DHEXE EE FEDERAALKA AH 53**

Qodobka 93aad:Xiriirka Dawlad Goboleedka Jubbaland iyo Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya. 53

Qodobka 94aad: iskaashiga dowladdaha xubinta ka ah dowladda federaalka 53

Qodobka 95aad: Hay'adaha Dawladdaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka.54

**CUTUBKA 8aad: Dhaqaalaha 55**

Qodobka 96aad: Hannaanka dhaqaalaha **55**
Qodobka 97aad: Dhaqaalaha suuqa xorta ah 55
Qodobka 98aad: kaalinta dhaqaalaha ee dowladda 55
Qodobka 99aad xisaab xirka sannad-maaliyeedka guud ee Dowladda 55

**CUTUBKA 9aad: Qodobbada Kama Danbaysta Ah 56**

Qodobka 100aad: Guddiga Dastuurka, Dib u Eegista iyo Dhaqangelinta Dastuurka 56
Qodobka101aad:Wax ka Beddelka Dastuurkan 56
Qodobka 102aad:Dhaqangelinta Dastuurka 56
Qodobka 103aad: Kutakri falka awoodaha iyo Khiyaano Qaran 57
Qodobka 104aad: Aaya katashiga Jubbaland. 57
Qodobka 105aad: Mabaadi'da Dastuuradda 57
Qodobka 106aad: magangalyad siyaasdeed iyo isu-celinta eedaysanayaasha /dambiilayaasha 57

Qodobka 107aad: xuquuqda shaqaalaha 58

Qodobka 108aad: Badbaadada shaqaalaha 58

Qodobka 109aad: Afti Dadweyne. 59

Qodobka 110aad: Axdiga Ku Meel Gaarka ah ee Jubbaland 59

**LIFAAQYADA 60**

JEDWALKA KOOWAAD: KHARIIRADA DAWLAD GOBALEEDKA JUBBALAND 60
JEDWALKA LABAAD: CALANKA DAWLAD GOBALEEDKA JUBBALAND 61
JEDWALKA SEDEXAAD: ASTAANTA DAWLAD GOBALEEDKA JUBBALAND 62

## CUTUBKA 1AAD: Dawladda Goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

### Qodobka 1aad: Aasaaska Dawladda Goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

1. Dowladda Goboleedka Jubbaland waxa lagu aasaasay, saldhigna looga dhigay rabitaanka shacabka deggen gobolada Jubbada Dhexe, Jubbada Hoose iyo Gedo.
2. Magaca dowladdu waa Dawladda Goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.
3. Dawladda Goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya waa dimuqraadi, kuna dhisan matalaadda shacabka oo loo dhan yahay, kuna salaysan nidaamka axsaabta badan iyo caddaalad bulsho.
4. Ilaahey Subxaanahu Watacaalaa ka sokow, awoodda oo dhan waxaa iska leh shacabka, waxayna u isticmaalayaan si toos ah ayagoo u adeegsanaya hey'adaha u xilsaaran si waafaqsan dastuurka iyo shuruucda Jubbaland.
5. Midnimada Dowladda Goboleedka Jubbaland waa lama taabtaan.

### Qodobka2aad: Sarraynta Sharciga

1. Ka dib Shareecada Islaamka iyo Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, Dastuurka ku meel gaarka ee Dawladda Goboleedka Jubbaland ayaa ah sharciga ugu sarreeya ee Jubbaland. Wuxuu hagaa Xukuumadda Hay'adaha Dawladda Goboleedka Jubbaland, siyaasadaha iyo go'aanada dhammaan waaxaha xukuumadda dawladda.
2. Sharci kasta, ama go'aan maamuleed oo ka soo horjeeda dasuurka ku meel gaarka ah ee Jubbaland waa waxba kama jiraan.

### Qodabka3aad: Mabaadi'da aasaasiga ah

1. Dawladda Goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya waa xubin ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya, waxayna u hoggaansamaysaa Dastuurka Ku Meel Gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.
2. Dhammaan dadka reer Jubbaland way u siman yihiin sharciga hortiisa, waxayna leeyihiin xuquuq, Sharaf iyo caddaalad bulsho.
3. Dastuurka Jubbaland wuxuu ku salaysan yahay mabaadi'da Quraanka Kariimka ah iyo Sunnada Nabigeenna Muxammed (naxariis iyo nabad-gelyo korkiisa ha ahaatee). Wuxuu dastuurkani ilaalinayaa maqaasidda (ujeeddooyinka) Shareecada Islaamka iyo cadaaladda bulshada.
4. Dawladda Goboleedka Jubbaland waxa lagu sameeyay mabaadi'da aasaasiga ah ee awood qaybsiga nidaamka Federaaliga ah (masuuliyaadka oo qaybsan).
5. Dastuurka Jubbaland wuxuu sugayaa xuquuqul insaanka, isku xukunka sharciga, shuruucda caalamiga ah iyo nidaamka kala qaybinta awoodaha sida: sharci dejinta, fulinta iyo garsoorka ee dawladda, si loo hubiyo isla xisaabtanka, maamul wanaagga iyo ka turjumidda masaalixda guud ee shacabka.
6. Haweenka waa in laga qayb geliyaa si dhab ah, dhammaan hay'adaha Dawladda Goboleed-ka, gaar ahaan xilalka la soo doorto ama la soo magacaabo ee saddexda laamood ee dowladda, Guddiyada Madaxa Bannaan iyo hay'adaha kale.

Qodobka 4aad: Diinta

1. Islaamku waa diinta keli ah ee rasmiga ah ee Dawladda Goboleedka Jubbaland.
2. Waxa reebban sharci kasta oo ka horimanaya mabaadi'da guud iyo ujeeddooyinka Shareecada Islaamka.

Qodobka 5aad: Dadka iyo tirikoobka

A. Dadka

1. Dadka reer Jubbaland waa shacabka Soomaaliyeed ee deggan Jubaland gobolada Jubbada Dhexe, Jubbada Hoose iyo Gedo.
2. Muwaadin kasta oo Soomaaliyeed oo degganaa Jubbaland ugu yaraan 6 bilood oo isku xiga waxaa loo aqoonsanaya inuu yahay reer Jubbaland.
3. Dadka dawladda jubbaland waa dadka udhashay jubbaland iyo qof kasta oo jubbalandnimada ku helay sifo sharci ah,
4. Xeer ugaar ah ayaa qeexi doona jubbalandnimada xaqa degenaashada iyo kasbashada meeqaamka jubbalandnimo.

B. Tirikoobka

1. Dadweynaha jubbaland 10kii sannaba mar baa la tirokoobayaa.
2. Xeer gaar ah ayaa tilmaami doona habraaca tirikoobka.

Qodobka 6aad: Dhulka iyo xuduudaha

1. Dhulka Jubbaland wuxuu ka kooban yahay gobolada Jubbada Dhexe, Jubbada Hoose iyo Gedo (sida kuxusan Jedwalka 1aad).
2. Xuduudaha Jubbaland waa xuduudihii ka jiray Soomaaliya ka hor 1991dii.
3. Jubbaland waxay xagga woqooyi xad kala leedahay Dowlad Gobaleedka Koonfur Galbeed ee Soomaaliya, xagga barina badweynta Hindiya, xagga galbeedna Itoobiya, dhinaca koonfureedna Kenya. Xuduudaha Jubbaland waa lamataabtaan.
4. jubbaland waxay soo dhaweyneysaa lana xaajoonaysaa degmo iyo gobol kasta oo doonaya iskaashi dhaqaale bulsho iyo deris wanaag.
5. dhulka jubbaland waxaa ku dhan hawada sare, berriga iyo dhulka hoostiisa jiidda dhaqaalaha ee badda waxaana mas'uul ka ah dowladda jubbaland.

Qodobka 7aad: Calanka iyo astaamaha

1. Calanka Jubbaland waxa lagu sifeeyey Jedwalka 2aad.
2. Astaanta rasmiga ah ee Jubbaland waxa lagu tilmaamay Jedwalka 3aad.

Qodobka 8aad: Caasimadda Dawladda

1. Bu'aale waa magaalo madaxda Dawladda Goboleedka Jubbaland.
2. Maqaamka caasimadda waxaa lagu qeexi doonaa sharci gaar ah oo uu ansixin doono baarlamaanka jubbaland.

Qodobka 9aad: Afka

1. Afka1aad ee rasmiga ah waa Af-Soomaali
2. Afka 2aad waa Af-Carabi
3. Afka 3aad waa Af-Ingiriisi (Afafka kale waxa loo adeegsan karaa wixii looga maarmi waayo).

## CUTUBKA 2AAD: Xuquuqaha iyo Xorriyaadka Aasaasiga ah

### Qodobka 10aad: Xaqa nolosha iyo caafimaadka

1. Xaqa nolosha

1. Qof kasta oo reer Jubbaland ahí waxa uu xaq u leeyahay nolol iyo in la ilaaliyo naftiisa iyo sharaftiisa.

2. Caafimaadka
    1. Waa mas'uuliyadda dowladda in ay daryeesho caafimaadka guud ee dadweynaha, ka hortag iyo daaweynba, gaar ahaan caruuuta iyo haweenka.
    2. Si loo fuliyo waajibaadkaas xukuumaddu, waxay dajinaysaa nidaam caafimaad oo wadani ah.
    3. Dowladda jubbaland waxay ogoshahay adeega caafimaad ee gaarka ah, furashada rugo caafimaad iyo isbitaalo. Adeegyada gaarka ah ee caafimaadka waxaa nidaaminaya xeerarka, waxaana kormeeraya xukuumada.

### Qodobka 11aad: Xuquuqaha Shakhsiga

1. Dadka oo dhammi way simanyihiin sharciga hortiisa
2. Qofna looma diidi karo xaquuqdiisa iyadoo loo eegayo midab, diin, jinsi, isir, muuqaal, hanti, fikir, aragti siyaasadeed, luuqad iyo asal ahaan.
3. Dadka laga tirada badanyahay waxay leeyihiin xuquuqdooda dastuuriga ah iyo midda aadaminimo.
4. Agoomaha, curyaamada, garaad dhimanka, dadka gaboobay iyo qofkasta o aan is daryeeli Karin cid daryeeshaana aysan jirirn, dowladda ayay waajib kutahay in ay daryeesho. (Dawladda ayay masuuliyad ka saarantahy daryeelidda dadka baahiyaha gaarka ah qaba)
5. Dowladu waa in ay dhiiri galisaa, samaysaa hay'ado gargaara iyo xarumo lagu xanaaneeyo dadka ku xusan faqrada 4aad ee qodobkaan.
6. Xeer gaar ah ayaa qeexaya dadka loo aqoonsanayo in aanay is daryeeli karin.

### Qodobka12aad: Xaqa Eedaysanaha iyo Xukumanaha

1. Eedaysanuhu waa ka beri dembi illaa ay maxakamadi si kama danbays ah u xukunto.
    I. Eedaysanaha marka la soo xiro waa in maxkamadda awoodda u leh lagu horkeenaa muddo 48 saacadood gudahood ah.
    II. Eedaysanaha waxaa lagu siideyn karaa dammaanad inta dacwaddiisu socoto
    III. Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu helo qareen difaaca. Diidmada xaqani waxay burinaysa kiiska loo haysto eedaysanaha.
    IV. Qofna looma qabankaro, xiri karo, loomana ciqaabi karo fal markii uu galayay aanan dembi ku ahayn sharciga.

2. Xaqqa xukumanaha
   I. Qofka maxakamadi xukuntay oo xiran waxa uu xaq uleeyahay ilaalinta nabadgelyadiisa iyo sharaftiisa aadaminimo.
   II. Qofka maxbuuska ah waxaa lagu dhaqayaa Xeerarka Soomalaiya , Jubaland iyo sharciyada caalamiga ah ee maxaabiista.
   .

Qodobka 13aad: Xurmada Hoyga

1. Waxaa reebban baaridda iyo gelidda hoyga qofka amar garsoore la'aantiis.
2. Waxaa waajib ah in amarka garsooraha loo akhriyo deggenaha hoyga.

Qodobka 14 aad: Xorriyadda ka Mid Noqoshada Urur

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay:

   III. inuu ka mid noqdo urur ama kooxda uu doono.
   IV. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu aasaaso ama ka mid noqdo urur sida ururrada shaqaalaha, xisbiyada siyaasadda iyo ururrada la midka ah.
   V. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in aanu ka mid noqon urur ama hay'ad midna, lagumana qasbi karo inuu ka mid noqdo koox ama urur.
   VI. Aasaasidda ururadu waa inay waafaqsan yihiin shurcuuda dalka.

Qodobka 15aad: Xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo codsi wadareedka

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay:
   I. In uu abaabulo, ka qayb qaato bannaanbaxyo ku salaysan hab nabadgelyo si sharciga waafaqsan.
   II. in uu cabasho qoraal ah oo shakhsi ama mid wadareed u gudbiyo laamaha xukuu-madda Dowlad Goboleedka Jubbaland.

Qodobka 16aad: Xuquuqda Haweenka iyo qoyska

1. Waa in sharci ahaan loo dhawro xuquuqda aadaminimo, dhaqaale, siyaasadeed iyo xoriyaadka haweenka sida ay farayso Shareecadu.
2. Waxaa reebban in la soo rido ilmaha uurka hooyada ku jira haddii aanay jirin xaalad hooyada nolosheeda khatar-gelineysa uuna caddeeyay dhakhtar aqoon u lehi.
3. Waxa reebban gudniinka gabdhaha, ee fircooniga waana dembi xeer ciqaabeed ah. Taas oo loo aqoonsanayo in uu yahay jir dil.
4. Qoysku waa aasaaska bulshada, oo ka bilowda nin iyo haweenay qaan gaaray oo si sharciga waafaqasan isku guursaday iyo caruurtooda, sharciga ayaana damaanad qaadaya sugnaantiisa.

Qodobka 17aad: Xuquuqda Carruurta iyo waxbarashada

1. Xuquuqda caruurta

a. Ereyga carruur ee qodabkan ku xusan waxa loola jeedaa qofka da'diisu ka yartahay 18 sano.
b. Carruurtu waxay xaq u leeyihiin nolol, magac, jinsiyad, daryeel caafimaad, waxbarasho iyo barbaarin.

c. Carruurta looma diri karo in ay qabtaan hawl ama adeegyo aan ku habbooneyn da'dooda, ama halis gelin-kara cafimaad kooda iyo koritaan kooda.

2. Waxbarashada
   a) Qof kasta xaq ayuu uleeyahay inuu waxbarasho helo
   b) Horumarinta iyo baahinta waa waajib saaran dowladda
   c) Dawladda ayaa u xilsaaran akhris/qoris la'aanta
   d) Waxbarashada aasaasiga ah ee caruurtu waa khasab , dowladda ayaana u xilsaaran helitaanka agabka iyo hawlwadeennada iyo waxbarashada. Marka ay duruuftu saamaxdo dowladdu waxa ay kor u qaadaysaa heerka waxbarashada khasabka ah.
   e) Dowladdu waxay dhiiri galinaysaa islamrkaasna tayeynaysaa waxbarashada diineed ee dugsiyada quraanka
   f) Waa mas' uuliyad dowladda diyaarinta tayeeynta iyo hubinta ku dhaqanka manhaj midaysan ee heerarka dugsiyada hoose ,

dhexe , iyo sare.

g) Barashada iyo tarbiyada diinta islaamku waa dariiqad aasaasi ah, dhamaan heerarka waxbarashada hoose, dhexe, iyo sare.

h) Qofka qaangaarka ahi waa u madax banaan yahay doorashadiisa waxbarasho iyo xirfadeed, dowladdana waxaa waa jib ku ah dhiiri galinta wax barashada dadka waaweyn iyo tan haweenka.

i) Waxaa la furan karaa dugsiyo waxbarasho , kuwo xirfadeed iyo jaamacadeed gaar ah oo waa faqsan manhajka dowladda kuna salaysan baahida iyo siyaasda waxbarashada dalka.

j) Dowladda xil ayaa ka saaran horumarinta hidaha iyo dhaqanka.

k) Dowladda waxaa waajib ku ah in ay taabbagaliso tacliinta sare.

l) Baarlamaanka ayaa soo saari doona Xeer gaar ah oo nidaaminaya waxbarashada gaarka ah.

3) Xaquuqda dhalinyarada iyo Horumarintooda.

a) Dawladda Jubbaland waxey ahmiyad gaar ah siineysaa daryeelka barbaarinta horumarinta dhalinyarada iyo isboortiga

b) dhismaha ururo dhalinyaro, daryeelka dhalinyarada hormarintooda iyo Dhisidda dhamaan garoomada kala duwan ee lagu horumarinayo dhalinyarada waxaa lagu qeexayaa xeer gaar ah iyadoo lagga ilaalinayo dhalinyarada in ay ku biiraan ururada xagjirka ah loona sameeynayo shaqo abuur.

## Qodobka 18aad: Mamnuucidda Addoonsiga

a) Qofna lama addoonsan karo,lama dulmin karo,lama tahriibin karo,si khasab ahna looguma shaqaysan karo.

b) Qofna xorriyadiisa lagama qaadi karo, xanibaaadkasta oo lagu sameeynaayo waa in ay sharciga ku cadahay.

c) Xoriyadda qofka waxaa shardi u ah inay kahor imaaneyn shareecada islaamka xeerarka, anshaxa guud, xasiloonida dalka ama xaquuqda qofkale.

## Qodobka 19aad: Xorriyadda Diinta iyo Caqiidada

1. Qof kasta waa u xor inuu diintiisa ku dhaqmo.
2. Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo Jubbaland

## Qodobka 20aad:Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay:
   I. Inuu yeesho, soona bandhigo ra'yigiisa, macluumaadkiisa iyo afkaartiisa.
   II. Qofku wuxuu fikraddiisa ku cabbiri karaa qaab saxaafadeed oo hadal ah, qoraal, muuqaal, suugaan iyo habab kale oo sharciga iyo anshaxa waafaqsan, waxaana reebban faaf reebka.
   III. Qof walba wuxuu xaq u leeyahay in uu muujiyo hal-abuurkiisa faneed, xorriyadiisa aqooneed iyo middiisa cilmi baariseedba.

## Qodobka 21aad: Saxaafadda

1. Saxaafaddu waa in ay heshaa xorriyad buuxda.
2. Xeer gaar ah ayaa qeexi doona xorriyadda saxaafadda.

## Qodobka 22aad:Xaqa Matalaadda

1. Sida Dastuurkani qabo:

   i. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu yeesho wakiil siyaasadeed oo matala.
   ii. qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu ka qayb galo arrimaha maamulka ee Jubbaland.
   iii. Barlamaanka Jubbaland ayaa samayn doona sharciga doorashooyinka, si waafaqsan Dastuurka Ku Meel Gaarka ah ee Jubbaland iyo kan Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya.

## Qodobka 23aad: Xaqa Lahaanshaha Hantida

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu yeesho hanti, kuna dhaqmo, ku naalloodo, iska gado ama iska wareejiyo markuu doono.
2. Xaqa lahaanshaha hantidu waa lama taabtaan. Barlamaanka Dawlad Goboleedka Jubbaland ayaa samayn doona sharci qeexaya qaabka loo yeelan karo hanti.
3. Xukuumaddu waxay si sharci ah hanti ula wareegi kartaa marka ay jirto dan guud oo si daah furan loo soo bandhigay. Qof kasta oo hantidiisa dan guud awgeed loogala wareegaa wuxuu xukuumadda xaq ugu leeyahay magdhaw caadil ah.

## Qodobka 24aad: Waajibaadka Muwaadinka Reer Jubbaland

Qof kasta waxa waajib ku ah:

1. dhowrista diinta islaamka dastuurka shuruucda kale ee dalka iyo kuwa caalamiga ah .
2. Dhawrista sharciga, una hoggaansamo awaamirta sharciga ah.
3. Adkaynta midnimada shacabka Ilaalinta nabadda xasilloonida iyo jiritaanka Jubbaland.

4. Ilaalinta deegaanka, ka qeyb galka difaaca jubbaland iyo markii loogu yeero ama ay lasooo gudboonaato.
5. Bixinta cashuuraha.
6. Isdiiwaan geliyo, codkiisana dhiibto xilliyada doorashooyinka
7. Sharci gaar ah ayaa qeexaya ciqaabta lagu mutaysanayo gudasho la'aanta waa jibaadka ku xusan qodobkan.

## Qodobka 25aad:Xuquuqda Doorashada

1. Qof kasta oo reer Jubbaland ah, oo jira 18 ama ka weyn wuxuu xaq u leeyahay in uu wax doorto, lana doorto.
2. Waxa ka reebban xubnaha ciidamada qalabka sida iyo garsoorayaashu in ay ka mid noqdaan xisbi siyaasadeed, loomana ogola in ay isu sharaxaan mansab la soo doorto.
3. Masuuliyinta sare ee laamaha xukuumadda looma ogola in ay isu soo sharaxaan xil la soo doorto, haddii aanay marka hore iska casilin mansabkay hayaan.
4. Xaqa codeynta ee qofka waa la laalayaa inta uu xabsiga ku jiro haddii ay mudada lagu xuku-may ka badan tahay lix bilood.
5. Murasharax u tartamaya xil la soo doorto Jubbaland, waa in aan lagu xukumin shan sano iyo ka badan oo xarig ah shantii (5) sano ee la soo dhaafay maalinta cod bixinta lagu dhawaaqo ka hor.
6. In uusan ka mid ahayn Ururada xag jirka ah
7. Hadii qofku yahay garaad dhiman ama maxkamadi cadayso inaanu gudan Karin xilkiisa, looma ogola in uu qabto xilalka dawladda.

**CUTUBKA 3AAD: Nidaamka Xukuumadda Dawlad Goboleedka Jubbaland**

Qodobka 26aad: Xukuumadda Dawlad Goboleedka

1. Dawlad Goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya waa nidaam madaxtooyo.
2. Barlamaanka Dawlad Goboleedka Jubbaland waxa lagu soo dooranayaa nidaamka siyaasadeed ee axsaabta badan, doorashaduna waa hal cod halkii qofba Markii lagaaro.
3. Dhammaan axsaabta diiwaan gashan ee soo buuxisa shuruudaha shuruucda axsaabta siyaasadeed way ka qayb geli karaan, wayna u ololeyn karaan doorashooyinka.
4. Sharci gaar ah ayaa lagu maamulayaa nidaamka doorashooyinka.

Qodobka 27 aad: Laamaha Dawladda

Saddexda laamood ee Xukuumadda Dowlad Goboleedka Jubbaland waa:
1. Golaha Barlamaanka
2. Fulinta
3. Garsoorka

**GOLAHA BAARLAMAANKA**

Qodobka 28aad: Qaab dhismeedka iyo Muddada Barlamaanka Dawlad Goboleedka

1. Barlamaanku waa Golaha Shacabka ee Dowlad Goboleedka Jubbaland,wuxuuna ka kooban yahay 75 xildhibaan. Dooraashooyinka barlamaanka ka dib marka la ansixiyo dastuurkan, ugu yaraan 15% xildhibannadu waa in ay noqdaan haween. Muddada barlaamanku waa shan (5) sano oo ka billaabanaysa maalinta la dhaariyo.
2. Kalfadhiyada Barlamaanku waa inay si rasmi ah u furmaan muddo 30 beri gudahood ah, oo ka billaabaneysa maalinta natiijada doorashooyinka si rasmi ah loo shaaciyo.

Qodobka 29aad: Shuruudaha Xubinnimada Baarlamaanka Dawlad Goboleedka Jubbaland.

1. Qof kasta oo reer Jubbaland ahi waxa uu isu sharixi karaa doorashooyinka barlamaanka Dawlad Goboleedka haddii:
   I. Ay da'diisu kaweyn tahay 25 sano.
   II. U diiwaan gashanyahay codbixiye ahaan.
   III. Aanay maxkamadi ku xukumin shan (5) sano iyo ka badan oo xarig ah, san (5) sano guda-hood inta aan lagu dhawaaqin doorashada baarlamaanka.
2. Guddiga Doorashooyinka iyo Xuduudaha ee Jubbaland waa in ay hubiyaan in musharraxi-intu dhammaan soo buuxiyeen shuruudaha sharciga ah ee looga baahan yahay musharrax kasta.

Qodobka 30aad:Sababaha Lagu Luminkaro Xubinnimada Barlamaanka Dawlad Goboleedka:

I. In uu xildhibaanku geeriyoodo.
II. In uu warqadda is-casilaadda u gudbiyo Afhayeenka Baarlamaanka
III. In lagu helo fal dambiyeed xeer ciqaabeed ah oo maxkamadi xukuntay, muddada xabsiguna ka badan tahay san (5) sano.
IV. In uu ka maqnaado labo ( 2) kalfadhi oo caadi ah iskuna xiga sabab la'aan.
V. Bedelaadda kursi bannaan oo Baarlamaanka ah qaabka loo buuxinayo waxa lagu maamulayaa sharciga doorashooyinka.
VI. Xubin xildhibaan ah haddii uu aqbalo qabashada xilkale oo dawladeed ama loo magacaabo Golaha Wasiirada, wuu luminayaa xubinnimadiisa Baarlamaanka. (faqradaan waxaa lagu badalayaa tan jaalaha ah.) (Haddii ay xubintu aqbasho xil Dawladeed aan wasiir ka ahayn)
VII. Dhaarinta xildhibaan cusub waa in lagu sameeyaa 30 beri gudahood, ka dib marka la shaaciyo natiijada doorashada.

Qodobka 31aad: Awoodaha iyo Masuuliyaadka Baarlamaanka Dawlad Goboleedka Jubbaland

1. Baarlamaanka Dowlad Goboleedka Jubbaland wuxuu leeyahay awoodahan iyo masuuliyaadkan:
I. Dib u eegidda, ansixinta, wax ka beddelka, diidmada, iyo tirtiridda sharci qabyo ah iyo mid jirayba ee Dawlad Goboleedka Jubbaland.
II. Ku ansixinta aqlabiyadda codbixineed ee (1/2+1) deyn lacageed oo ay dowladda Jubbaland heshiis kula gasho hay'ad shisheeye oo ah kuwa daynta bixiya.
III. Ku ansixinta aqlabiyadda codbixineed ee (1/2+1) heshiisyada iskaashiga caalamiga ah ee Jubbaland ay qayb ka tahay.
IV. Doorashada Madaxweynaha Jubbaland, codbixintuna tahay qarsoodi ama Gacantaag.

2. Ansixinta ama diidmada:
a. Degmooyin ama gobollo cusub oo ay soo jeediso samayntooda xukuumadda Jubbaland
b. Xubnaha Guddiyada madaxabannaan iyo garsooreyaasha.
c. Barnaamijyada xukuumadda.
d. ansixinta Miisaaniyadda guud ee dawladda ay xukuumaddu usoo gudbiso sanad walba iyo wax kabeddelka miisaniyaddaas. Dawladdaha hoosena waxay ansixinayaan wixii loo qoondeeyo.
e. Xisaab xirka miisaaniyad sannadeedkii hore.
f. Ku ansixinta ama diidmada aqlabiyadda codbixineed ee (50%+1) Golaha Wasiiradda.
g. Xasaanad kala noqoshada mas'uuliyiinta la soo doorto ama baarlamaanku ansixiyaan.
Haddi masuul xaq u leh xasaanad lagu qabto asagoo dembi faraha kula jira, baarlamaanka waa in la soo ogeysiiyaa, lagana codsadaa in ay fasaxaan dacwadku oogidda masuulkaas.
h. Ansixinta iyo diidmada hindiseyaasha ay xukuumaddu ku aasaasayso ama ku kala dirayso hay'adaha dawliga ah

3. Barlamaanka Jubbaland waxa uu leeyahay Awoodahan Kormeer:

I. Baarlamaanku wuxuu kormeeraa, ka doodaa, xukuumaddana dusha ka saaraa mas'uuliyaadka dhaqan gelinta siyaasadaha xukuumadda

II. Baarlamaanku wuxuu u yeeri karaa mas'uuliyiinta sare ee xukuumadda si ay ugala

xisaabtamaan siyaasadaha xukumadda, kharashaadka iyo go'aanada maamulka ee xukuumadda.

III. In ay u yeeraan madaxweynaha Dawlad Goboleedka Jubbaland si uu uga jawaabo su'aalaha ay qabaan barlamaanku hal mar kalfadhigiiba.

4. In ay kormeeraan, qiimeeyaanna dhaqan gelinta shuruucda Dawlad Goboleedka Jubbaland

I. In ay u yeeraan masuulyiinta sare ee xukuumadda si ay u kormeeraan.

II. Haddii masuul baarlamaanku u yeeray soo xaadiri waayo cudurdaar la'aan, baarlamaanku waa in uu ogeysiiyaa madaxweynaha, kana talo bixiyaan sidii tallaabo looga qaadi lahaa.

III. Baarlamaanku wuxuu u soo gudbiyaa Golaha Wasiirrada talo bixin ku saabsan miisaaniyadda iyo habaynta arrimaha maaliyadda ka dib markay warbixin ka helaan Hanti-Dhawrka Guud ee Jubbaland.

5. Barlamaanka Jubbaland waxa uu leeyahay awoodahan matalaadeed:

I. Wuxuu matalaa danaha shacabka Jubbaland.

II. Wuxuu matalaa masaalixda deegaannada soo doortay xildhibaan kasta oo xubin ka ah golaha Baarlamaanka Jubbaland.

## Qodobka 32[aad]: Xasaanadda Xildhibaannada Baarlamaanka

I. Xildhibaannada Baarlamaanku waxay leeyihiin xasaanad markasta.

II. Xildhibaan laguma dacweyn karo marka fikirkiisa uu ka dhiibto doodaha kalfadhiyada ama kulamada guddiyada Baarlamaanka.

III. Haddii aysan ogolaan baarlamaanku, xubin ka mid ah golaha lagumasoo oogi karo dacwad xeer ciqaabeed muddada uu hayo xilka xildhibaannimada, lama xiri karo, lamana baari karo isaga gaarigiisa iyo hoygiisaba, haddii aan lagu qaban isagoo dembi faraha kula jira.

Haddii aanu barlamaanku ansixin, xildhibaan lama xiri karo xataa haddii maxkamadi amarto.

IV. Sharci gaar ah ayaa qeexaya xasaanadda xildhibaanada xubnaha ka ah Baarlamaanka Dawlad Goboleedka Jubbaland.

## Qodobka 33aad: Kalfadhiyada Baarlamaanka

1. Baarlamaanka lasoo doortay waa inuu u fadhiistaa kalfadhigiisa 1aad muddo 30 beri gudahood ah, ka dib marka ay Guddiga Doorashooyinku ku dhawaaqdo natiijada rasmiga ah.

2. Baarlamaanku waa inuu yeeshaa labo ( 2) kalfadhi oo caadi ah sannadkii. kalfadhi kasta waa inuu socdaa ugu yaraan afar (4) bilood.

3. Xeer hoosaadka Baarlamaanka ayaa go'aaminaya waqtiga,taariikhda iyo muddada fasaxaee kalfadhiyada inta aan la furin kalfadhiga caadiga ah ee baarlamaanka.

4. Baarlamaanku wuxuu yeelan karaa kalfadhi aan caadi ahayn marka:

I. Madaxweynaha Jubbaland uu codsado ka dib markuu talo ka helo Golaha Wasiirrada.

II. Afhayeenka baarlamaanku uu isugu yeero.

III. Haddii 20%xildhibaannada ay usoo gudbiyaan codsi qoraal ah oo sababaysan afhayeenka.

## Qodobka 34aad: Kala Diridda Baarlamaanka Dawlad Goboleedka Jubbaland

1. Baarlamaanka lama kala diri karo marka ay mudadiisu dhamaato, waxaa bedalaya baarlamaan lasoo doortay.
2. Baarlamaanka waa lakala diri karaa:
   I. Haddii aqlabiyadda xildhibaannada xubnaha ka ahi ay iscasilaan.
   II. Haddii barlamaanku uu ku guul darraysto inuu qabto 2 kalfadhi oo isku xiga sababla'aan.
3. Madaxweynuhu waa inuu codsi qoraal ah u gudbiyaa Maxkamadda Dastuurka si loo hubiyo haddii hal ama dhammaan shuruudaha kor ku xusan ay dhacaan.
4. Ka dib marka ay soo saarto Maxkamadda Dastuurku xukunkeeda, Madaxweynuhu waa inuu soo saaraa wareegto uu ku kala dirayo Barlamaanka Jubbaland.
5. Wareegtada waa in lagu amraa in lagu qabanayo doorashada muddo (45) beri ah guda-
   hood.

## Qodobka 35aad: Kalsooni-kala noqoshada wasiirrada

1. Baarlamaanku waxay go'aamin karaan codka kalsooni-kala noqoshada ee Golaha Wasiirra-da wadar ahaan, laakiinse aan ahayn keli, keli.
2. Ugu yaraan 20 xildhibaan oo ka mid ah xubnaha Baarlamaanka ayaa soo Jeedin kara mooshinka codka kalsooni kala noqoshada Golaha Wasiirrada.
3. Ugu yaraan seddex meelood, hal meel (1/3) tirada guud ee xildhibaanadu waa in ay ogolaadaan in laga doodo mooshinka kalsooni kala noqoshada si dooddiisa loo furo.
4. Tirada guud ee xildhibaanada 2/3 (saddex meelood labo meel) waa inay u codeeyaan si kalsoonida loogala noqdo Golaha Wasiirrada.
5. Haddii codka kalsooni kala noqoshada la meel mariyo, madaxweynuhu waa inuu soo dhisaa Gole Wasiirro oo cusub. Golihii hore waa inuu shaqadiisa usii wado si caadi ah illaa laga soo dhisayo xukuumad cusub, Barlamaankuna ansixiyo.
6. Madaxweynuhu hal (1) mar oo keliya ayuu soo bandhigi karaa liiska xubnaha Golaha Wasiir-rada ee mooshinka kalsooni kala noqoshada lagu qaaday.
7. Haddii codka kalsooni kala noqoshada lagu qaado Golaha Wasiirrada, madaxweynuhu waa inuu ku soo magacaabaa xukuumad cusub 30 beri gudahood oo ka billaabaneysa maalinta la meel mariyey codka kalsooni kala noqoshada.

## Qodobka 36aad: Xeer Hoosaadka Baarlamaanka Dawlad Goboleedka Jubbaland

1. Baarlamaanku waa inuu samaystaa xeer hoosaad u saamaxaya in dhammaan xildhibaannadu ay si habsami leh uga qayb qaataan arrimaha Golaha.
2. Baarlamaanku waa inuu sameeystaa guddi Joogto ah iyo guddi hoosaadyo fuliya waajibaadka Golaha.
3. Marka hindise sharciyeed loo soo gudbiyo Baarlamaanka, waa in guddiga u xilsaaran loo gudbiyaa si ay ugu kuur-galaan, ka dibna warbixin iyo talo bixin ay ugu soo gudbiyaan kulamada Baarlamaanka.
4. Hindise sharciyeed uu baarlamaanku diiday laguma soo celin karo golaha

afar (4) bilood gudahood, laga billaabo maalintii la diiday sharciga qabyo qoraalka ah.

5. mudada uu baarlamaanku fasaxa ku maqanyahay waxaa shaqada sii wadaya guddiga joogtada ah.

I. Ugu yaraan 10 xildhibaan oo xubin ka ah Baarlamaanka Jubbaland



6. Doodaha Baarlamaanka iyo guddiyadiisuba waa in fadhiyadoodu ahaadaan kuwa u furan dadweynaha haddii uu saamaxayo amnigu
7. Xeer hoosaadka Baarlamaanka ayaa tilmaami doona goorta iyo sida warbaahinta loogu ogolaanayo Golaha Barlamaanka.
8. Doodaha kalfadhiyada waa in sidooda loo qoraa ama si elekteroonik ah loo duubaa, laguna kaydiyaa aarkiifiyada rasmiga ah ee barlamaanka.

Qodobka 37aad:Qaabka Xeer Dejinta

1. Sharci qabyo qoraal ah waxaa u soo jeedin kara baarlamanka:

   I. Ugu yaraan 10 xildhibaan oo xubin ka ah Baarlamaanka Jubbaland
   II. Golaha Wasiirada
   III. Koox reer Jubbaland ah oo dhan ugu yaraan 5,000 oo qof, una diiwaangashan codbixiyeyaal.

Qodobka 38aad: Qaabka Muwaadin u soo Gudbiyo Sharci Qabyo Qoraal ah:

1. Haddii koox reer Jubbaland ahi ay soo jeedinayaan sharci qabyo qoraal ah, waa in lagusoo lifaaqo waraaqaha caddaynaya magaca, da'da, saxiixa shakhsiyaadka iyo caddaynta Jubbalandinimada.
2. Dadka lagu xusay qodobka 38(1) waa in ay ku soo lifaaqaan sharciga qabyo qoraalka ahmagacyada ugu yaraan 2 qof oo lala xiriiri karo.
3. Shakhsiyaadka ku xusan qodobka 38(1) looma ogola in ay soo gudbiyaan sharci qabyo qoraalah oo la xiriira nidaamka canshuurahata ama dakhliga soo galaya qasnadda dowladda, miisaaniyadda iyo arrimaha maaliyadda, difaaca ama arrimaha amniga.
4. Barlamaanku waa inuu kaga baaraan degaa codsiga qabyo qoraalka ee loo soo gudbiyay isla kalfadhigaas loo soo gudbiyey ama kalfadhiga xiga,dabadeedna xildhibaanadu u codeeyaan.

Qodobka 39aad:Doodaha Hindise Sharciyeedyada Baarlamaanka

1. Hindise sharciyeed kasta oo la hor keeno Baarlamaanka waa in looga doodaa qodob-qodob inta aan cod loo qaadin.
2. Hindise sharciyeedka baarlamanku ansixiyo waa in uu afhayeenku saxiixaa isagoo 3 nuqul ah,ka dibna loo gudbiyaa Madaxweynaha.
3. Hindise sharciyeedka Baarlamaanku uu diido lagumasoo celin karo mar kale kallfadhiga lagu diiday.
4. Sharciga qabyo qoraalka ah ee miisaaniyadda dawladda waa in Golaha Wasiirradu soo hordhigaan barlamaanka ugu yaraan 30 beri ka hor inta aan loo codayn

### Qodobka 40aad: Ogolaanshaha iyo Faafinta Rasmiga ah

1. Madaxweynuhu waa inuu muddo 30 beri ah ku ogolaado ama ku diido sharci baarlamaanku uu ansixiyey.
2. Haddii aanu madaxweynuhu waxba ka qabin:
   I. sharcigaasi waa ansax, waana in lagu daabacaa faafinta rasmiga ah 30 beri gudahood. Markaa ka dib waa in loo diraa xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud si loogu kaydiyo aarkiifiyada Dowladda.
   II. Nuqulada sharciga cusub waa in lagu kaydiyaa aarkiifiyada Baarlamaanka, xafiiska Madaxweynaha iyo xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubbaland.
3. Marka lagu daabaco faafinta rasmiga ah, sharcigu wuxuu dhaqan gelayaa muddo 15 beri ah ka dib.

### Qodobka 41aad: Diidmada Qayaxan ee Madaxweynaha

1. Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyahay inuu diido sharci baarlamaanku ansixiyey,
2. Diidmada madaxweynaha waa in uu ku soo gudbiyo qoraal uu ugu sheegayo Barlamaanka sababaha uu u diiday inuu saxiixo sharcigaas.

### Qodobka 42aad:Jebinta Diidmada Qayaxan ee Madaxweynaha

1. Haddii Madaxweynuhu uu sharci qabyo qoraal ah oo Barlamaanku ansixiyay ku isticmaalo diidmada qayaxan waxaa lagu jebin karaa diidmadiisa marka sharciga dib loogusoo celiyo Baarlamaanka, kadibna codka tirada guud ee xildhibaanada 2/3(saddex meelood labo meel) ay ku meelmariyaan sharcigaas.
2. Afhayeenka Baarlamaanka Jubbaland waa in uu dib ugu diraa sharciga Madaxweynaha isagoo ku lifaaqaya farriin in diidmadiisii cod Barlamaan lagu jebiyey.
3. Madaxweynuhu markuu helo qoraalka in diidmadiisii la jebiyey, waa inuu ogolaadaa sharciga qabyo qoraalka ah si uu u noqdo qaanuun, una gudbiyaa xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud si uu ugu soo saaro sharciga faafinta rasmiga ah.
4. Wuxuu dhaqan galayaa sharcigaasi cusubi 15 beri ka dib.

### Qodobka 43aad: Durid Sharci

1. Sharci maray habraaca ansixinta sharciyada ee baarlamaanka waxaa lagu duri karaa oo keliya in codsi loo gudbiyo Maxkamadda Dastuurka haddii uu sharcigu ka soo horjeedo dastuurka.
2. Sida ku xusan qodobka 43(1) sharci la ansixiyey waxa duri kara:
   i. II.Golaha Baarlamaanka 1/3 (saddex meelood hal meel).
   II. Golaha Wasiirada,
   III. ugu yaraan 5,000 oo qof, oo diiwaangashan codbixiyeyaal

## GOLAHA FULINTA

### Qodobka 44aad: Fulinta

1. Golaha Fulintu wuxuu ka koobanyahay:
   I. Madaxweynaha
   II. Laba 2 Madaxweyne ku xigeen
   III. Golaha Wasiirrada
2. Awoodda fulinta ee Dowlad Goboleedka Jubbaland waxaa leh Golaha Fulinta oo ka kooban Madaxweynaha, Madaxweyne ku xigeenada, iyo Golaha Wasiirrada.
3. Golaha Wasiiradu waa hay'adda ugu sarraysa fulinta ee xukuumaddaJubbaland.
4. Madaxweynaha Jubbaland ayaa soo magacaabaya Golaha Wasiirrada. Xubnaha Golaha Wasiirradu waxay ka iman karaan Baarlamaanka iyo shacab weynaha kale..

### Qodobka 45aad: Qaab Dhismeedka iyo Shuruudaha Golaha Fulin-ta

1. Golaha Fulintu waxay ka koobanyihiin Madaxweynaha, Madaxweyne kuxigeenada iyo golaha wasiiradda
2. Golaha Wasiiradu way ka badan karaan 15wasiir. (laalidda qodobka soo jeedinayna)
3. Si loogu magacaabo qof in uu ka mid noqdo Golaha Wasiirrada waxaa laga rabaa inuu buuxiyo shuruudaha hoos ku xusan:
   I. Inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed oo deggen Jubbaland.
   II. Inuu haysto shahaado jaamacadeed, ama in uu leeyahay 10 sano oo waayo-aragnimo ah.
   III. In uu leeyahay ugu yaraan 7 sano oo maareyn ama khibrad maamul ah.
   IV. In ay da'diisu tahay 30 sano iyo ka weyn.
4. Madaxweynaha, Madaxweyne Ku Xigeenada, Golaha Wasiirrada, iyo masuuliyiinta sare ee dawladda looma ogola inay ganacsigooda gaarka ah maamulaan muddada ay xilka xafiiska hayaan.
5. Xubin ka mid ah Golaha Fulinta kama qayb qaadan karto wada hadal, umana codeyn karto arrin golaha hortaalla oo masuulkaas maslaxadi ugu jirto ama u eg.
6. Madaxweynaha, Madaxweyne kuxigeenada iyo xubnaha Golaha Wasiiradu waa inay u caddeeyaan hantidooda Hanti Dhawrka Guud bisha u horreysa ka dib marka xilka loo dhaariyo.
7. Dhammaan go'aannada ay qaataan Golaha Wasiirradu si aqlabiyad ah waa masuuliyad wadareed.

### Qodobka 46aad: Magacaabista Madaxweyne ku xigeenada iyo Golaha Wasiirada

1. Madaxweynaha ayaa soo magacaabaya ku xigeenada waxaana la horkeenayaa baarlamaanka si ay ugu ansixiyaan cod hal dheeri ah.
2. Xubnaha Golaha Wasiirrada waa inuu:
   I. Soo magacaabo Madaxweynaha Jubbaland
   II. Waa in baarlamaanku cod hal dheeri ah (1/2+1) ku ansixiyo wadar ahaan
   III. Horgaynta baarlamaanku ee Goluhu waa inayna ka badan 30 beri oo ka billaabaneysa maalinta Madaxweynaha la dhaariyo.

Qodobka 47[aad]: Qaab Dhismeedka iyo Waajibaadka Golaha Fulinta ee Jubbaland

1. Dawlad Goboleedka Jubbaland waxay ka koobantahay:
   a. Golaha Fulinta
   b. Maamulka gobollada
   c. Maamulka degmooyinka
2. Xeer gaar ah ayaa qeexaya awoodaha iyo xiriirka xukuumadda iyo maamullada gobollada iyo degmooyinka. Baarlamaanka Dawlad Goboleedka Jubbaland waa inuu sidoo kale sameeyaa sharci gaar ah oo qeexaya awoodaha, masuuliyaadka isticmaalka kharashaadka iyo khayraadka dhaqaale ee qaybaha Dawladdu ey leeyihiin.
3. Xukuumadda Jubbaland waa in ay:
   I. Isticmaashaa awoodda fulinta
   II. Ku shaqaysaa mabaadi'da dimuqraadiyadda
   III. Dejisaa ayna fulisaa qorshayaasha horumarineed ee dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka
   IV. Waa in ay dejisaa ayna fulisaa siyaasadaha maaliyadeed iyo dhiiri gelinta maalgashiga.
   V. Waa in ay diyaarisaa miisaaniyad sannadeedka ku tala galka ah eeJubbaland.
   VI. Waajibaadka shaqo ee xukuumadda waxaa lagu soo saarayaa xeer hoosaad qeexaya hawlahooda
4. Maamulka gobollada iyo degmooyinka
   a. Guddoomiyeyaasha gobollada, degmooyinka waxaa magacaabaya Madaxweynaha. Duqa Magaalada waa lasoo dooranayaaa sida uu qabo xeerka Dawladdaha Hoose.

      i. Ka dib marka uu la tashado wasiirka ay khusayso iyo masuuliyiinta gobolka.

II. Shuruudaha xulitaanka waa in lagu saleeyaa aqoon, karti iyo waayo-aragnimada musharaxa.

III. Degmo kasta waxay yeelaneysaa dhaqaale loo qoondeeyay sida ku xusan habraaca wasaaradda maaliyadda.

IV. Sharciga goleyaasha deegaanka ee Jubbaland oo uu baarlamaanku soo saari doono ayaa dejinaya mabaadi'da guud ee saldhigga u noqonaya hab-maamuleedka degmada, xil gudashada iyo adeegsashada awoodaha degmooyinka.

V. Madaxweynaha jubbaland ayaa kala diri kara golaha deegaanka.

Qodobka 48[aad]: Awoodaha iyo Masuuliyaadka Golaha Wasiirrada

Golaha wasiirradu waxay leeyihiin masuuliyaadkan soo socda:

I. Wuxuu goluhu soo jeediyaa, isku soo dubbaridaa, fuliyaana isteratiijiyadda siyaasadeed, nabadgelyo, dhaqaale iyo horumarinta bulshada.
II. Wuxuu soo qeexaa awoodaha gaarka ah ee ay leeyihiin waaxaha hoos yimaadda fulinta
III. Wuxuu soo jeediyaa canshuuro cusub. Wuxuu wax kabeddel ku samayn karaa qaab canshuureedyadii hore iyadoo loo eegayo baahida shacabka.
IV. Wuxuu ansixiyaa misaaniyadda sannadka ee xukuumadda, sida qiyaasta dakhliga iyo saadaasha kharashaadka xukuumadda sannad maaliyadeedka

soo socda. Wuxuu qeexaa doorka shaqaalaha dowladda iyo mushaaraadkooda, una gudbiyaaBaarlamaanka ugu yaraan 3 bilood ka hor inta aaanu billaaban miisaaniyad sannadeedku.

V. Wuxuu goluhu Soo jeediyaa xaaladaha masiibooyinka dabiiciga ah ee kajira dalka waxayna u gudbiyaan madaxweynaha si uu ugu dhawaaqo xaalad deg-deg ah, madaxweynuhu wuxuuna u gudbiyaa Baarlamaanka muddo 30 beri gudahood ah si ay u ansixiyaan.

VI. madaxweynaha waxa uu soo magacaabaa hay'adaha iyo xafiisyada

madaxa bannaan iyo hay’adaha kale ee dawladda.

VII. Wuxuu magacaabaa Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuuriga, Maxkamadda Sare, Xeer ilaaliya Guud iyo Garsooreyaasha kale Heer-Dowlad goboleed, soo-jeedinta Guddiga Adeegga Garsoorka ka dib.

VIII. Wuxuu horkeenayaa Baarlamaanka si uu ansixiyo Hanti Dhawrka Guud, iyo Guddoomiyaha Bangiga dhexe ee Jubbaland.

VIII. Wuxuu ka baaraan degaa, go’aamiyaa maamulaana dhammaan arrimaha siyaasadeed iyo amni ee uu awoodda usiinayo dastuurka jubbaland iyo shuruucda kale ee dalka.

**GARSOORKA**

Qodabka 49$^{aad}$: Qaab dhismeedka Garsoorka Jubbaland

1. Garsoorka Jubbaland wuxuu ka kooban yahay:
   I. Maxkamadda Dastuurka
   II. Maxkamadda sare
   III. Maxkamadda Racfaanka ee Gobollada
   IV. Maxkamadda Derejeda Kowaad (gobollada & degmooyinka).
   V. Maxkamadda Militeriga
2. Garsoorku wuu ka madaxbannaan yahay Barlamaanka iyo Golaha Fulinta. Dhammaan garsooreyaashu waa in ay haystaan dammaanad muddada xilka loo magacaabay.

Qodobka 50$^{aad}$: Awoodaha iyo xilalka Garsoorka

Awoodaha garsoorku waa:
1. Dhageysiga iyo go’aaminta dacwadaha. Xukunnada garsoorku waa in lagu saleeyaa Sha- reecada Islaamka, dastuurka Jubbaland, dastuurka Jamhuuriyadda Federalka ee Soomaa-liya, shuruucda caalamiga ah iyo qawaaniinta kale ee u yaalla dalka.
2. Maxkamadda ciidamadu waxay qaadi kartaa oo keliya dacwadaha ciidamada.
3. Garsoorka Jubbaland awood uma laha inuu dhagaysto dacwadaha la xiriira u gudbinta muwaadin danbi ka galay dalkale.
4. Sharci gaar ah oo baarlamaanku soo saari doono ayaa nidaamin doona awoodaha iyo masuuliyaadka Maxkamadda Sare, Maxkamadda Racfaanka ee Gobolka iyo Maxkamadaha Derajada Koowaad.

Qodobka 51$^{aad}$: Awoodaha iyo Masuuliyaadka Maxkamadda Sare

1. Maxkamadda Sare:
   I. waa maxkamadda ugu sarreysa Jubbaland.
   II. Maxkamadda sare waa inay u gudbisaa Guddiga Adeegga Garsoorka xeer qabyo qoraal ah oo la xiriira shuruucda arrimaha maamulka garsoorka. Sharicgaa qabyada ah waxa loo gudbinayaa barlamaanka Jubbaland si uu uga doodo.
   III. Maxkamadda sare waxay xallisaa khilafaadka maxkamadaha ee la

xiriira awoodaha.
IV. Maxkamadda sare waxay xukun kama danbayn ah ka soo saartaa racfaannada laga qaato maxkamadaha hoose.

V. Maxakamadda sare waxay xallisaa khilafaadka arimaha qawaaniinta ee maxkamadaha hooseee aanay awoodda u lahayn.
VI. Maxkamadu waxay xukuntaa qaab sharciyeedka la raacay dacwadaha lagu go'aamiyey dalka dibaddiisa ee laga fulinayo gudaha Jubbaland.
VII. Maxkamadda sare waxay kormeertaa maxkamadaha hoose iyo qaab maamuleedka garsoorka.
VIII. Maxkamadda sare waxay dhagaysataa dacwadaha maamuleed ee masuuliyiinta sare.

2. Awoodaha Maxkamadda Sare waxalagu qeexaya sharci uu saaro barlamaanka Jubbaland.
3. Tirada garsooreyaasha Maxkamadda Sare waxa lagu go'aamin doonaa sharci gaar ah.

Qodobka 52aad: Shuruudaha Garsooraha Maxkamadda Sare

1. Garsooraha maxkamadda sare waa inuu buuxiyaa shuruudahan:
   I. Yahay muwaadin Soomaliyeed, Muslim ah, oo reer Jubbaland ah.
   II. Aysan maxkamadi ku xukumin danbi xeer ciqaabeed oo shan (5) sano iyo ka badan ah.
   III. Da'diisu ka yarayn 40 sano
   IV. Haystaa shahaado heer jaamacadeed oo ah shareecada ama qawaaniinta.
   V. Leeyahay ugu yaraan 5 sano oo khibrad garsoorennimo ah, ama ugu yaraan 6 sano oo khibrad qareenimo ah.
   VI. Leeyahay daacadnimo.

Qodobka 53aad: Maxkamadda Racfaanka ee Gobollada

1. Maxkamadda Racfaanka ee Goballada waxaa xarun u ah caasimadaha gobollada Jubbal-and.
2. Maxkamaddu waxay dhagaysataa dacwadaha racfaanka lagaga qaadanayo go'aannada maxkamadaha hoose.
3. Maxkamadda racfaanka ee gobolladdu waxay awood u leedahay oo keliya gobolka ay ka hawl gasho.
4. Maxkamadda racfaanka ee gobolka waxay dacwad ku galeysaa ugu yaraan saddex (3) garsoore.
5. Shuruudaha garsooreyaasha maxkamadda racfaanka waxay la mid yihiin shuruudaha u yaalla garsooreyaasha Maxkamadda Sare sida ku xusan sida uu dhigayo dastuurkan.

Qodobka 54aad: Maxkamadaha Derejada kowaad (Degmada & Gobolka)

1. Maxkamadaha derejada kowaad waxa ay dhageysan karaan dacwadaha oo dhan marka laga reebo kuwa la xiriira maamulka iyo dacwadaha dastuurku uu caddeeyey in ay dhagey-staan maxkamadda ka sare.
2. Tirada garsooreyaasha maxkamadaha derejada kowaad waxalagu soo go'aamindoona sharci gaar ah.

Qodobka 55aad: Maxkamadda Dastuurka Jubbaland

1. Jubbaland waxay yeelanaysaa Maxkamad Dastuuri ah oo ka kooban 7 garsoore oo uu ku jiro Gudoomiyaha Maxkamadda dastuurka iyo ku xigeenkiisa.
2. Garsooreyaasha Maxkamadda Dastuurka ee Jubbaland waxaa soo magacaabaya Gudiga Adeega Garsoorka oo magacyadooda u gudbiyaa Golaha Baarlamaanka Jubbaland si ay ugu ansixiyaan aqlabiyadda hal dheeriga ee (1/2+1).
3. Garsooreyaasha Maxkamadda Dastuurku waxay dhexdooda ka dooranayaan guddoomiye iyo kuxigeenkiisa.
4. Maxkamadda Dastuurka Jubbaland waxa ay u hoggaansmaysaa sharciga oo keli ah garsoor iyo maamul ahaanba.
5. Maxkamadda Dastuurka Jubbaland waa in ay yeelataa maamul uu hogaaminayo Xoghaye Guud
6. Haddii xubin ama ka badan ka bannanaato Maxkamadda Dastuurka waa in lagu soo buuxiyaa xubintaas muddo 45 beri gudahood ah.
7. Xarunta Maxkamadda Dastuurku waxay noqonaysaa caasimadda Jubbaland.
8. Qaab dhismeedka maxkamadda iyo awoodaha waxaa qeexi doona sharci gaar ah.

Qodobka 56aad: Awoodaha iyo Masuuliyaadka Maxkamadda Dastuurka

1. Maxkamadda Dastuurku waxay awood u leedahay:
   I. Inay buriso xeer, xeer-hoosaad, wareegto iyo amar maamul gabi ahaan ama qayb ahaan, sababo la xiriira in uu dastuurka ka hor imanayo.
   II. Maxkamadda Dastuurku waxay xukuntaa dacwadda muwaadin uu ku dacwoonayo in xuquuqdiisa dastuuriga ah lagu xad gudbay.
   III. Maxkamadda Dastuurku waxay go'aannadeeda waafajisaa ujeedooyinka Shareecada Islaamka iyo Dastuurka Jubbaland.
   IV. Maxkamadda Dastuurku waxay go'aan ka gaartaa khilafaadka u dhexeeya hay'adaha dowlad Gobaleedka Jubbaland, awoodahooda iyo masuuliyaadkooda dastuuriga ah.
   V. Maxkamadda Dastuurku waxay ka jawaabtaa codsiyada uu usoo gudbiyo Baarlamaanka Jubbaland ee la xiriira dastuurka ama hindise sharciyeed u yaalla Baarlamaanka.
   VI. Waxa ay go'aan ka gaartaa in ay dastuurka waafaqsiiyaan mooshinnada xilka lagaga qaadayo Madaxweynaha Jubbaland.
2. Sharci gaar ah ayaa qeexi doona qaabka ay u fulinayso Maxkamadda Dastuurku masuuli-yaadkeeda.

Qodobk 57aad: Hab-raaca Go'aannada Maxkamadda Dastuurka

1. Maxkamadda Dastuurku waxay ku go'aamisaa xukunnadeeda aqlabiyadda cod hal dheeri ah (1/2+1).
2. Go'aannada Maxkamadda Dastuurku waa in bulshadu ay ogaataa laguna soo saaraa faafinta rasmiga ah ee dowladda. Go'aannada Maxkamadda Dastuurka waa in xoghayuhu u diraa dadka ama hay'adaha ay khusayso.

Qodobka 58aad: Shuruudaha Garsooreyaasha Maxkamadda Das- tuurka

1. Garsooreyaasha Maxkamadda Dastuurka waa in ay buuxiyaan shuruudaha ku xusan qodobka 52aad ee dastuurkan.

Qodobka 59aad: Sababaha Lagu Waayi Karo Xubinnimada Maxkammadda Dastuurka

1. Xubinnimada Maxkamadda Dastuurka waxaa lagu waayi karaa haddii garsooruhu:
   - I. Lumiyo shardi ka mid ah shuruudihii lagu soo xulay.
   - II. Geeriyoodo
   - III. Uu noqdo hawl gab joogta ah.
   - IV. Is casilo lagana aqbalo.
   - V. Ku xadgudbo Shareecada Islaamka, Dastuurka Jubbaland ama shuruucda kale ee u yaalla dalka.
   - VI. Maxkamadi ku xukunto dembi xeer ciqaabeed.

Qodobka 60aad: Guddiga Adeegga Garsoorka

1. Guddiga Adeegga Garsoorku waa in uu ahaadaa:
   - I. Xor, dhexdhexaad, dhinacna raacsanayn.
   - II. Hubiyaa in garsoorku xor yahay
   - III. Guddiga Adeegga Garsoorku waxa uu talo bixin ka siiyaa xukuumadda arrimaha gar-soorka,
   - IV. Maamulaa hay'adaha garsoorka Jubbaland.
2. Guddiga Adeegga Garsoorku garsoorku wuxuu ka koobanyahay:
   - I. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.
   - II. Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka.
   - III. Xeer Ilaaliyaha Guud.
   - IV. 2 qof oo bulshada ku leh ixtiraam oo ka mid ah ururrada bulshada rayidka, mid ka midihina tahay dumar.
   - V. 2 qareen oo madaxweynuhu kasoo magacaabayo Ururka Qareenada Jubbaland.
   - VI. Waajibaadka iyo xilalka Guddiga Adeegga Garsoorka waxaa lagu qeexi doonaa sharci gaar ah oo baarlamaanku ansixiyo

Qodobka 61aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Guddiga Adeegga Garsoorka

1. Guddigu wuxuu leeyahay awoodaha iyo masuuliyaadkan:
   - I. Soo jeedinta magacaabista, casilaadda, beddelaadda, iyo dallacsiinta xubnaha garsoorka Jubbaland.
   - II. Ka hor inta aan la aasaasin Guddiga Adeegga Garsoorka, garsooreyaasha maxkamadaha waxaa soo jeedinaya Wasiirka Cadaaladda.

III. Guddigu wuxuu masuul ka yahay maamulka shaqaalaha garsoorka.
IV. Guddigu wuxuu aasaasaa, maamulaana goobaha tababarka garsooreyaasha iyo xog-hayeyaashooda si ay u helaan tababar joogta ah oo la xiriira aqoontooda farsamo.
2. Sharciga lagu aasaasayo Guddiga Adeegga Garsoorku waa in uu qeexaa qaabka loo soo xulayo garsooreyaasha iyo hawl wadeenada kale ee garsoorka.
3. Talo bixinta Guddiga Adeegga Garsoorka ee la xiriirta magacaabista, casilaadda, dallacsiinta, beddelaadda garsooreyaasha maxkamadaha, ku xigeennada Xeer Ilaaliyeyaasha Jubbaland, waxa ay ku xiran tahay ogolaanshaha Golaha Wasiirada, waxaa lagu soo saaraa wareegto Madaxweyne.

Qodobka 62aad: Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubbaland

1. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud:
   I. Wuxuu ka jawaabaa arrimaha sharciga.
   II. Wuxuu u hoggaansamaa sharciga oo keliya.
   III. Xarunta Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waa caasimadda Jubbaland.
2. Awoodda Xeer Ilaaliyaha Guud waxay ku baahsan tahay Jubbaland oo dhan.
3. Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud wuxuu ka kooban yahay:
   I. Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubbaland.
   II. Kuxigeenka Xeer Ilaaliyaha.
   III. Xeer Ilaaliyeyaasha Gobollada.
4. Xeer Ilaaliyaha Guud iyo ku xigeenkiisu waxay derejo ahaan la siman yihiin garsooreyaasha maxkamadda sare.
5. Xeer Ilaaliyeyaasha Gobolladu waxay lamid yihiin xagga derejada garsooreyaasha maxkamadaha racfaanka. Waxaa soo jeedintooda iska leh Wasaaradda Caddaaladda magacaabiddooda, dallacsiintooda, beddelaaddoo-da iyo casilaaddoodana awood u leh madaxweynaha. (Inta farta guduudan waa in la tuura )
6. Xeer Ilaaliyeyaasha waxay leeyihiin xuquuq iyo xasaanad la mid ah tan garsooreyaasha.

Qodobka 63aad: Shuruudaha iyo Magacaabidda Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Ku Xigeenkiisa

1. Golaha Fulinta Gudiga adeega garsoorka ayaa soo jeedinaya magacaabidda Xeer Ilaaliyaha Guud iyo kuxigeenkiisa.
   Waxaa wareegto ku soo saaraya magacaabistooda Madaxweynaha ka dib baarla-Maanka ayaa ansixinayo.
2. Shuruudaha u yaalla Xeer Ilaaliyaha Guud iyo kuxigeenkiisa:
   I. Waa inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed oo Muslim ah
   II. Waa in aanay da'diisu ka yarayn 40 sano.
   III. Waa inuu haysto shahaado jaamacadeed bartayna sharciga,
   IV. Leeyahay khibrad shaqo oo shan (5) sano oo garsoorennimo ah, ama lix (6) sano oo qareennimo ah.

Qodobka 64aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud

1. Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud wuxuu awood u leeyahay inuu dacwad ku soo oogo, kuna muddaco saraakiisha sare ee dawladda iyo kuwa xasaanada leh isagoo

umaraya meesha ay khuseyso si uu dacwad uu ugusoo oogo maxkamadda horteeda.

2. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu leeyahay masuuliyaadkan:
   I. Dhaqan gelinta shuruucda iyo ka hortagga falal dembi oo ka dhaca Jubbaland.
   II. Agaasinka, baaritaannada, oogidda dacwadaha falal dembiyeedyada iyo maxkamaday-ntooda.
   III. Wuxuu kormeeraa xaaladaha xabsiyada iyo goobaha dhaqan celinta.
   IV. Wuxuu ilaaliyaa, difaacaa xuquuqda ilmaha, agoonta, dadka dhimirkoodu dhimanya-hay iyo cidkasta oo u baahan daryeel sharci.
   V. Waxa uu gutaa xilalka iyo waajibaadka kale ee uu siiyo sharcigu.
   VI. Wuxuu faafinta rasmiga ah ku soo saaraa shuruucda, wareegtooyinka iyo heshiisyada uu madaxweynuhu saxiixo.
   VII. Wuxuu kaydiyaa shuruucda, go'aanada iyo heshiisyada caalamiga ah.
   VIII. Wuxuu ilaaliyaa hantida dawladda, gudaha iyo dibedda Jubbaland.
   IX. Wuxuu dhexdhexaadiyaa hay'adaha dowladda.
   X. Shuruudaha, awoodaha iyo masuuliyaadka Xeer Ilaaliyaha Guud waxaa lagu qeexi doonaa sharci gaar ah oo uu baarlamaanku ansixiyo

Qodobka 65[aad]: Awoodaha iyo Masuuliyaadka Kuxigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud

1. Marka uu maqanyahay Xeer Ilaaliyaha Guud, ama uu si kumeel gaar ah xilkiisa u gudankari waayo, masuuliyaadkiisa waxaa la wareegaya kuxigeenkiisa.
2. Wuxuu kala taliyaa Xeer Ilaaliyaha Guud arrimaha Xeer Ilaalinta.
3. Kuxigeenku wuxuu qabtaa shaqada uu Xeer Ilaaliyaha Guud u xilsaaro isagoo gudanaya waajibaadka xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.

Qodobka 66[aad]: Xil Ka Qaadista Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Kuxi- geenkiisa

1. Xeer Ilaaliyaha Guud iyo ku xigeenkiisa waxaa keliya oo xilka looga qaadi karaa si sharciga waafaqsan.
2. Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Ku Xigeenkiisa waxay xilka ku waayi karaan haddii lagu qabto iyagoo faraha kula jira fal dembiyeed, ama maxkamadi kuriddo xukun kama dambays ah.
3. Marka farqadaha (1), (2) ee qodobkani ay dhacaan, waxaa xil ka qaadista soo jeedinaya Golaha Xukuumadda Gudiga Adeega Garsoorka, una gudbinaya Golaha Baarlamaanka,si ay xasaanadda uga qaadaan, loona maxkamadeeyo Xeer Ilaaliyaha iyo Kuxigeenkiisa.

## CUTUBKA 4aad: Doorashooyinka Dawlad Goboleedka Jubbaland

### Qodobka 67aad: Doorashooyinka Guud

1. Xilliga dastuurka ku meel gaarka ah ka dib Madaxweynaha, Ku Xigeennadiisa, Golaha Baarlamaanka iyo Goleyaasha Deegaanka toos ayaa loo soo dooranayaa.
2. Cod bixinta waa in ay si caddaalad ah, xor ah, waafaqsanna nidaamka sharciga ah u dhacdaa, una maamulaan Guddiga Doorashooyinka iyo Xuduudaha Jubbaland.
3. Waxa reebban in qof lagu farageliyo cidda uu dooranayo.
4. Waqtiga ay dhacayso doorashadu waxa go'aaminaya Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Jubbaland iyo? Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka iyo Xuduudaha Jubbaland. ( fiiri qodobka 72aad faqrada 14aad)
5. Bilowga xilliga doorashadu waa in aanay ka yaraan lix (6) toddobaad ka hor maalinta ay doorashadu bilaabanayso.
6. Sharci gaar ah oo ku aaddan doorashooyinka Madaxweynaha, Madaxweyne ku Xigeennada iyo xubnaha Barlmaanka Jubbaland waa in la ansixiyaa xilliga kala guurka ah.

### Qodobka 68: Qaabka Doorashada Madaxweynaha

1. Illaa inta lagagaarayo Doorasho hal qof iyo hal cod ah waxaa Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Jubbaland Dooranaya Baarlamaanka Jubbaland iyadoo aan lagu samayn Karin wax fara gelin ah. Goobta Doorashada ay ka dhaceyso waxaa Amnigeeedana sugaya ciidamada Dowlad Goboleedka Jubbaland.

2. Barlamaanka Jubbaland ayaa dooranaya Madaxweynaha, muddada xilkuna waa shan (5) sano taas oo lagu cusboonaysiin karo doorasho kale.
3. Muddada uu Dastuurka ku meel gaarka yahay Madaxweyne ku Xigeennada waxaa soo magacaabaya Madaxweynaha, Barlamaankuna wuxuu ku ansixinayaa cod hal dheeri (50% +1)

### Qodobka 69aad: Shuruudaha Musharraxa Madaxweynenimada

1. Tartanka madaxweynenimadu waa u furan yahay muwaadin kasta haddii uu buuxiyo shuruuaha soo socda:
   a. Muwaadin Soomaaliyeed oo reer Jubbaland ah
   b. Yahay Muslim
   c. Haysto shahaado jaamacadeed ama leeyahay ugu yaraan 10 sano oo ah khibrad maamul ama hoggaamin,
   d. Caafimaadka iyo dhimirkiisuna taam yahay
   e. Yahay ugu yaraan afartan (40) sano jir
   f. Ku sifoobay daacadnimo iyo asluub wanaagsan
   g. Maxkamadi ku xukumin dembi xeer ciqaabeed ah

### Qodobka 70aad: Muddada Xil Haynta:

Madaweynaha iyo Madaxweyne ku Xigeennada waxa ay xilka haynkaraan muddo shan (5) sano ah, laga soo billaabo taariikhada la shaaciyay natiijada doorashada, waxaana xilka loo dooran karaa mar walbo.

## Qodobka 71aad: Qaabka Doorashada Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Jubbaland Muddada Ku Meel Gaarka ah illaa laga gaarayo Doorasho hal qof iyo hal cod ah.

1. Barlmaanka Jubbaland waa in uu soo doortaa madaxweynaha Jubbaland.
2. Fadhiga doorashada madaxweynahana waxaa guddoominaya Afhayeenka Barlamaanka Jubbaland.
3. Ugu yaraan 2/3 (seddex meelood, laba meel) tirada guud ee xubnaha Barlamaanka Jubbaland waa in ay soo xaadiraan doorashada Madaxweynaha.
4. Murashaxnimada xilka madaxweynenimada waa in ay soo jeediyaan ugu yaraan 10 xild-hibaan.
5. Marka xildhibaannada Barlamaanka Jubbaland ay u codaynayaan doorashada madaxweynaha xildhibaan kastaa wuxuu leeyahay hal cod.
6. Musharrax kasta oo u taagan xilka madaxweynenimo waa in uu u caddeeyo Barlamaanka Jubbaland, una soo bandhigo barnaamijkiisa doorasho.

7. Doorashada madaxweynuhu waa in ay u dhacdaa sida soo socota:
   a. Doorashada Madaxweynuhu waa cod bixin qarsoodi ah ama gacan taag ah.
   b. Musharraxii hela 2/3 (seddex meelood, laba meel) codadka xildhibaannada Barlamaanka Jubbaland ee goobjoogga ah ayaa loo doortay madaxweynenimada Jubbaland.
   c. Haddii musharraxna uu heli waayo aqlabiyadda 2/3 (seddex meelood, laba meel) wareegga koowaad, wareegga labaad ee codbixinta waxa ka qayb gelaya afarta musharrax ee hela codadka ugu badan wareegga koowaad, musharrixii hela 2/3 (seddex meelood, laba meel) codadka wareegga labaad ayaa noqonaya madaxweynaha la doortay ee Jubbaland.
   d. Haddii musharaxna uu heli waayo aqlabiyadda 2/3 (seddex meelood, laba meel) ee loo baahan yahay wareegga labaad, wareegga seddexaad ee codbixinta waa in ay u tartamaan labada musharrax ee hela codadka ugu badan wareegga labaad, musharrixii ku guulaysta codadka ugu badan wareegga seddexaad ayaa noqonaya madaxweynaha la doortay ee Jubbaland
   e. Haddii ay u tartamayaan 2 musharrax doorashada madaxweynaha, waxaa loo codaynayaa hal wareeg oo keli ah. Musharraxa hela cod hal dheeri ah (50%+1) ayaa ku guulaysanaya tartanka.

## Qodobka 72aad: Awoodaha iyo Musuuliyaadka Madaxweynaha Jubbaland

1. Madaxweynuhu waa masuulka ugu sarreeya dawladda, ahna madaxa Golaha Fulinta.Madaxweynuhu waa astaanta midnimada shacabka Jubbaland.
2. Madaxweynuhu wuxuu masuul ka yahay in uu ilaaliyo dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka u yaalla.
3. Madaxweynuhu waxa uu ka soo magacaabi karaa xukuumadda xubnaha baarlamaanka iyo dad aan xubno ka ahaynba.
4. Madaxweynuhu kama maqnaan karo Jubbaland muddo ka badan 30 beri oo xiriir ah, haddii aanay jirin xaalad caafiimaad darro ah oo aan u saamaxaynin.
5. Asagoo latashanaya kuxigeennadiisa, Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyahay inuu soomagacaabo, casilana xubnaha Golaha Fulinta ee xukuumadda, madaxda xafiisyada madaxa bannaan, iyo madaxda kale ee dawladda ee uu awooda usiinayo dastuurka jubbaland ama shuruucda kale ee Jubbaland

awood u siinayso inuu soo magacaabo ama xilka ka qaado.

6. Madaxweynuhu wuxuu ogolaadaa, ama diidaa siyaasadaha maamulka oo ay xukuumaddu rabto inay fuliso, asagoo raacaya dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka u yaalla.

7. Madaxweynuhu waxa uu kala xaajoodaa Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya sida ay uga qayb gelayso Dawlad Goboleedka Jubbaland Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, heshiisyana la galaa Xukuumadda Federaalka, kuwaas oo u baahan in ay ansixiyaan Golaha Wasiirada iyo Barlamaanka Jubbaland.

8. Madaxweynuhu wuxuu qaabilaa wufuudda caalamiga ah ee booqashada rasmiga ah ku yimaadda Jubbaland.

9. Madaxweynuhu wuxuu bixiyaa billad sharaf la guddoonsiiyo muwaadinka ama ajnabiga mutaysta.

10. Madaxweynuhu wuxuu cafis u fidiyaa maxaabiista xiran asagoo latashanaya garsoorka.

11. Madaxweynuhu wuxuu furaa, khudbadna ka jeediyaa kalfadhiyada Baarlamaanka. Wax faalo ama su'aal ah oo ku saabsan khudbada madaxweynaha majiri karto.

12. Madaxweynuhu wuxuu soo saaraa wareegto uu kusoo rogayo xaalad deg-deg ah si looga hortago:

    a. Musiibooyinka dabeeciga ah sida abaaro, duufaanno, iyo
    b. Rabshado ama kacdoon sharci darro ah oo gudaha Jubbaland ka dhaca.

13. Madaxweynuhu waa inuu u gudbiyaa wareegto ku saabsan xaaladaha deg-degga ah Baarlamaanka Jubbaland 30 beri gudahood sida ku cad qodobada Dastuurkan.

14. Madaxweynuhu waa in uu si rasmi ah ugu dhawaaqo taariikhda la qabanayo doorshada ka dib marka ay go'aamiyaan Guddiga Doorashooyinka iyo Xuduudaha Jubbaland.

15. Madaxweynuhu wuxuu soo saaraa xeerar ay go'aamiyeen Golaha Wasiirada si loo fuliyo qawaaniinta Barlamaanku ansixiyey. Xeerasha madaxweynuhu kama hor imaan karaan shuruucda Barlamanku soo saaro.

16. Madaxweynuhu wuxuu gutaa masuuliyaadka iyo awoodaha sharciga Jubbaland uu siiyey.

17. Madaxweynuhu wuxuu soo magacaabaa Guddoomiyaha iyo Garsooreyaasha Maxkamadda Sare ka dib marka ay soo jeediyaan Guddiga Addeegga Garsoorku.

18. Madaxweynuhu wuxuu magacaabaa guddoomiyaha, garsooreyaasha iyo xeer ilaaliyeyaasha Maxkamadda Ciidamada Jubbaland.

19.madaxweynuhu waxa uu wareegto madaxweyne ku kala diraa golayaasha deegaanka ee lasoo doortay.

### Qodobka 73aad: Awoodaha iyo Masuuliyaadka Madaxweyne Ku Xigeennada Jubbaland

1. Madaxweyne Ku Xigeenku wuxuu la wareegayaa masuuliyaadka Madaxweynaha marka uu dalka ka maqan yahay ama si ku meel gaar ah ay xil-gudasho la'aani ku dhacdo.

2. Madaxweyne ku Xigeenku waa inuu katala bixiyaa soo magacaabidda iyo casilaadda wasiirrada iyo wasiir kuxigeennada iyo masuuliyiinta sar-sare ee dawladda Jubbaland.

3. Madaxweyne kuxigeenku wuxuu qabtaa xilalka madaxweynuhu u xilsaaro ee ka midka ah awoodaha Madaxweynaha

4. Haddii madaxweyne kuxigeenku iscasilo, geeriyoodo,la casilo ama hawsha u gudan waayo caafimaad darro awgeed,Madaxweyne kuxigeenka 2aad ayaa loo dhaarinayaa Madaxweyne kuxigeen, waxaa u dhammaystirayaa muddada xilka ka hartay.

5. Haddii arrimaha ku xusan farqadda 4aad ee qodobkani ay dhacaan, Barlamaanka Jubbaland waa in uu Madaxweyne ku xigeen cusub ku doortaa muddo 30 beri guda-hood ah.

6. Haddii Madaxweyne ku Xigeenadu ay hal mar wada geeriyoodaan, is-casilaan, la casilo, madaxweynaha ayaa soo magacaabaya madaxweyne kuxigeenada muddo 60 beri gudahood ah.

Qodobka 74[aad]:Xil Ka Qaadista Madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeennada

**a) Xil Ka Qaadista Madaxweynaha**

1. Baarlamaanku waxay soo jeedin karaan xil ka qaadista Madaxweynaha haddii lagu helo khiyaano ama inuu jebiyey dastuurka iyo shuruucda kale ee u yaalla Jubbaland.
2. Mooshinka Madaxweynaha xilka looga qaadayo waxaa soo jeedin kara ugu yaraan 1/3 (saddex meelood hal meel) ee tirada guud xildhibaannada Baarlamaanka Jubbaland.
   Haddii la ansixiyo waa in loo gudbiyo Maxkamadda Dastuurka ee Jubbaland oo hoggaamin doonta kiiska ka dhanka ah madaxweynaha in uu aasaas sharci ah ku qotomo.
3. Madaxweynaha waxaa xil kaqaadis ku samayn kara ugu yaraan 2/3 (saddex meelood laba meel) ee tirada guud ee xildhibaannada Jubbaland kadib marka maxkammadda dastuurka ay soo caddeyso eedaynta ah in uu jebiyey dastuurka ama shuruucda kale ee u yaalla Jubbaland.
4. Haddii xil ka qaadis lagu sameeyo madaxweynaha si waafaqsan dastuurka, Guddomiyaha Baarlamaanka ayaa la wareegaya xilka, waxaana Madaxweyne Lagu soo dooranayaa mudo lixdan (60) cisho Gudahood ah.

**b) Xilka qaadis madaxweyne ku xigeennada.**

1. Baarlamaanku waxay soo jeedin karaan xil ka qaadista Madaxweyne kuxigeennada haddii lagu helo khiyaano ama inuu jebiyey dastuurka iyo shuruucda kale ee u yaalla Jubbaland.
2. Mooshinka Madaxweyne ku xigeennada xilka looga qaadayo waxaa soo jeedin kara ugu yaraan 1/3 (saddex meelood hal meel) ee tirada guud xildhibaannada Baarlamaanka Jubbaland.
3. Madaxweyne ku xigeennada waxaa xil kaqaadis ku samayn kara ugu yaraan 2/3 (saddex meelood laba meel) ee tirada guud ee xildhibaannada Jubbaland mana ahan wadar waa kali kali.
4. Haddii xil ka qaadis lagu sameeyo Madaxweyne ku xigeennada si waafaqsan dastuurka, Madaxweynuhu waa in uu soo magacaabaa Madaxweyne Kuxigeennada una gudbiyaa baarlamaanka si ay ugu ansixiyaan cod hal dheeri ah (50%+1).

Qodobka 75[aad]: Madaxweynaha haduu Geeriyooda ama is casilo.

1. Haddii uu madaxweynuhu iscasilo, wuxuu warqad rasmi ah, oo uu isku casilayo u

qorayaa Afhayeenka Baarlamaanka.

2. Haddii madaxweynuhu Geeriyooda waxaa deg deg xilka uula wareegaya Afhayeeenka Baarlaanka Jubaland waxaana lagu soo dooranayaa madaxweyne kale mudo lixdan (60) maalmood gudahood.

## Qodobka 76aad:Qaabka Dhaarinta Madaxweynaha iyo madaxda kale ee Jubbaland.

Inta aanu la wareegin xilka, Madaxweynaha iyo madaxda kale waa in lagu dhaariyaa Baarlamaanka hortiisa. Waxa dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama Af hayeenka Barlamaanka.Dhaartu waa inay u dhacdaa qaabkan:

> *“waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay in aan xilkayga u guto si daacad ah, oo danta dadka, diinta, iyo dalku ay ku jirto, dhawrana dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka u yaalla.”*

## Qodobka 77aad:Doorashada Afhayeenka iyo Ku Xigeennadiisa

1. Fadhiga 1aad oo uu Baarlamaanka Kalfadhigiisa 1aad ku furmaayo waxaa hoggaaminayo xildhibaanka ugu da'da weyn, oo ah Guddomiyaha kumeelgaarka ah isla markaasna qabanaayo Guddiga soo dooran lahaa afhayeenka iyo ku xigeennaddisa.
2. Haddii ay maqan yihiin afhayeenka iyo ku/xigeenadiisa, Guddoomiyaha Guddiga Dastuurka ayaa guddoominaayo kulanka si kumeel gaar ah.
3. Inta aanu la wareegin xafiiska, afhayeenka iyo kuxigeenadiisa waa in eey iska casilaan haddii eey xil rasmi ah kahaayan xisbi siyaasadeed,waana inuu noqdaa dhexdhexaad muddada uu gudanayo waa-jibaadkiisa.
4. Afhayeenka iyo 2da kuxigeen waa in lagu soo doortaa cod-bixin qarsoodi ah ama gacantaag cod aqlabiyad ah tirada guud ee xubnaha Baarlamaanka Waxaa ay xilka oga qaadi karaan Afhayeenka iyo ku xigeennadiisa cod aqlabiyad ah 2/3(sed-dex meelood labo meel) codadka xubnaha Baarlamaanka Jubbaland.

## CUTUBKA 5aad: Guddiyada Madaxa Bannaan

### Qodobka 78aad: Mabaadi'da Guud

1. Guddi Madaxa Bannaani waa hay'ad xor ka ah faragelinta xukuumadda iyo siyaasadda, una isticmaali karta khibradeeda hawl gaar ah.
2. Guddi Madax Bannaani waa inay ilaalisaa mabaadii'da xuquuqul insaanka,dimoqraadi-yadda iyo hufnaanta.
3. Guddi Madax Bannaani waa inay xor ka tahay faragelinta shakhsi ama laamaha kale ee xukuumadda.
4. Miisaaniyadda Guddiyada Madaxa Bannaan waa in lagu qoondeeyo miisaaniyad san-nadeedka Baarlamaanku ansixiyo.

### Qodobka 79aad:Aasaaska Guddiyada Madaxa Bannaan

Dowladda Jubbaland waa in ay yeelato guddiyo madax bannaan oo waajibaadkooda lagu qeexi doono shuruuc gaar ah oo Baarlamaanku ansixiyo.

### Qodobka 80aad:Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuququl Insaanka

1. Waa in la dhisaa Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuquuqul Insaanka oo u xilsaarraan doona:
   a. Xoojinta xuquuqul Insaanka, dhaqanka dhawrista xuquuqda aadanaha.
   b. Ilaalinta, Horumarinta iyo adkaynta xuquuqul insaanka.
   c. Kormeerka, qiimaynta iyo la socodka dhawrista xuquuqul insaanka ee Jubbaland.
2. Guddiga Xuquuqul Insaanku waa inay qabato hawlahan:
   a. Dabagalka, kawarbixinta iyo la socodka tacadiyada loo geysto xuquuqul insaanka.
   b. Wax kaqabashada ku habboon falalka kadhanka ah xuquuqul insaanka.
   c. Samaynta cilmi baaris.
   d. Wacyi-gelinta bulshada ee arrimaha xuquuqul insaanka.
3. Hay'adda xuquuqul insaanku waa inay tahay xor, dhexdhexaad iyo mid loo dhan yahay
4. Xubnaha hay'adda xuquuqul insaanka waxay ka koobnaanayaan shan (5) xubnood, oo laba ka mid ahí tahay dumar.
5. Qaab dhismeedka, awoodaha iyo masuuliyaadka hay'adda xuquuqul insaanka waxa lagu qeexi doonaa sharci uu baarlamaanku soo saari doono.

### Qodobka 81aad:Guddiga Madaxa Bannaan ee la Dagaallanka Musuqmaasuqa

1. Jubbaland waa in ay yeelataa Guddiga ladagaalanka musuqmaasuqa oo u xilsaaran in ay dabagalaan arrimaha la xiriira musuqmaasuqa hantida dadweynaha.
2. Guddigu waxay awood u leeyihiin inay iskood baaritaanno u billaabaan, iyadoon lasoo gaarsiin wax dacwad ah si looga hortago musuqmaasuq inuu dhaco.
3. Guddigu waxay leeyihiin Masuuliyaadkan:

a. waxay xoojiyaan tallaabooyinka lagaga hortagayo musuqmaasuqa.
b. waxay xoojiyaan, taageeraanna iskaashiyada caalamiga ah ee kahortagga musuqmaa-suqa.
c. waxay xoojiyaan la xisaabtanka iyo maamulka suubban ee hantida dadweynaha.

4. Awoodaha guddiga la dagaallanka Musuqmaasuqa waxaa ka mid ah:
a. Waxay baaraan, joojiyaan, faafiyaan warbixinnada falalka musuqmaasuqa.
b. Waxay xayiraan, lawareegaaanna faa'iidooyinka laga helo falal danbiyeedka.
c. Waxay caawiyaan soo jeedinta sharci qabyo qoraal ah oo fududayn kara dacwadaha ka dhanka ah musuqmaasuqa.

5. Awoodda Guddiga La Dagaalanka Musuqmaasuqa waxa ka mid ah arrimaha la xiriira:
a. Waxay daba galaan musuqmaasuqa masuuliyiinta muwaadiniinta ah ama ajnabi ah ama hawl wadeennada hay'adaha caalamiga ah, iyadoo la tixgelinayo heshiisyada dawladda Federaalka ee Soomaaliya ay la gasho hay'adaha caalamiga ah iyo shuruuc-da ay Soomaaliya saxiixday.
b. Waxay ka hortagaan xatooyada masuuliyiinta ay kula kacaan hantida dadweynaha iyo midda gaarka loo leeyahay.
c. Waxay ka hortagaan khalkhal gelinta ganacsiga.
d. Ka faa'iidaysiga sharci darrada ah.

6. Guddigu waa xor,dhexdhexaad,waxayna matalaan bulshada.
7. Xubnaha guddigu waa toddoba (7) oo ugu yaraan 2 ka mid ahí ay dumar yihiin.
8. Sharci gaar ah ayaa qeexaya qaab dhismeedka iyo waajibaadka guddigan oo baarlamaankuansixin doono.

## Qodobka 82aad:Guddiga Xallinta Khilaafaadka Isticmaalka Dhulka iyo Dib u Heshiisiinta

1. Jubbaland waa inay yeelataa Guddiga Madaxa Bannaan ee Xallinta khilaafaadka Isticmaalka Dhulka iyo Dib u Heshiisiinta oo dhiirigelin doona samaynta siyaasado ku saabsan isticmaal-ka dhulka iyo nidaamka lahaanshaha dhulka ee Jubbaland, si loo hubiyo in uu cadaaladd-a iyo sinnaanta ku qotomo.
2. Guddigu waa in ay dhiirigeliyaan dib u heshiisiinta iyo midnimada bulshada, hubiyaanna inarrimaha la xiriira khilaafaadka isticmaalka dhulka lagu xalliyo qaab sharci ah.
3. Xubanaha ka mid noqonaya guddigan waa in aanay ka badan toddoba (7), ugu yaraanna laba (2) ay dumar noqdaan.
4. Masuuliyaadka, waajibaadka iyo qaab dhismeedka Guddigan waxaa lagu qeexi doonaa sharci gaar ah oo Baarlamaanka Jubbaland soo saari doono.

## Qodobka 83aad:Guddiga Madaxa Bannaan ee Ciidamada Amniga

1. Jubbaland waxa ay yeelanaysaa Guddiga Madaxa Bannaan ee ciidamada amniga oo ah gud-di madax bannaan,oo kakooban khubaro ku takhasusay dhanka amniga iyo arrimaha bulshada.
2. Waajibaadka hay'adda waxaa ka mid ah:
a. Inay baarto,horumariso qaab amni oo u adeegaya masaalixdaJubbaland.
b. Inay u soo hindisto hindiseyaal ku saabsan arrimaha ammaanka iyo qaabkii loo sugi lahaa ammaanka guud ee Jubbaland.
c. Inay soo jeediyaan qaab lagu kormeero kharashaadka laamaha amniga.

d. Inay u raadiso magdhaw dhibbanayaasha wax yeello ay u geysteen laamaha amnigu.

3. Awoodaha guddiga waxa ka mid ah:
   a. Ka hortagga arrimaha burcad badeedda.
   b. Dhaqan-celinta maleeshiyaadka si ay uga mid noqdaan bulshada.
   c. In ay u raadiyaan magdhaw ciidamada ku wax yeeloobay iyagoo gudanaya waajibaad-kooda.
4. Waa inay guddigu soo dhisaa guddi hoosaadyo ka kooban khubaro takhasus u leh arrimaha amniga si ay u fuliso hawlaheeda.
5. Guddigu waxuu ka kooban yahay 5 xubnood oo ay ugu yaraan 2 ka mid ahí dumar yihiin. Waxaa xubnaha guddiga soo magacaabaya Madaxweynaha Jubbaland markuu latashi kala sameeyo cidda ay khuseyso, waxaana ansixinaya Baarlamaanka.
6. Barlamaanka Jubbaland waa in uu ansixiyaa sharci lagu aasaasayo qaab dhismeedka iyo waa-jibaadka Guddiga Madaxa Bannaan ee Ciidamada Amniga.

Qodobka 84aad: Guddiga Madaxa Bannaan ee Nabadda iyo dib u Heshiisiinta

1. Waa in la aasaasaa Guddiga Madaxa Bannaan ee Nabadda iyo Dib u Heshiisiinta si loo dhiirigeliyo
   a. Dib u heshiisiin iyo midnimada bulshada
   b. In arrimaha la xiriira aargoosiga, gabbood falada iyo arrimaha kale ee dhaliya rabshada-ha loo xalliyo
   c. Hubinta in sharciga iyo arrimaha dawladdu hagayso la raaco.
2. Guddiga Nabadda iyo dib u heshiisiinta waa xor, dhex-dhexaad, loona dhan yahay
3. Waxa xubnaha guddiga ka mid noqonaya odayaasha dhaqanka, xildhibaanada Baarla-maanka Jubbaland, ururada bulshada rayidka ah, garsooreyaasha iyo ciidamada ammaanka.
4. Baarlamaanka Jubbaland ayaa ansixin doona sharci gaar ah oo qeexaya awoodaha iyo masuuliyadaha guddiga madaxa bannaan ee ammaanka iyo dib u heshiisiinta.

Qodobka 85aad:Guddiga Madax Bannaan ee Adeegga Shaqaalaha Rayidka ah

1. Dowlad Goboleedka Jubbaland waxay yeelaneysaa Guddiga Madaxa Bannaan ee Adeegga Shaqaalaha Rayidka.
2. Qaab dhismeedka, awoodaha, iyo masuuliyaadka guddiiga waxaa lagu qeexi doona sharci gaar ah.

Qodobka 86aad: Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuduudaha iyo Doorashooyinka Jubbaland

Dawladda goboleedkuna u noqoto xubin muhiim ah, oo ka mid ah Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Soomaaliya.

1. Dawlad Goboleedka Jubaland waxay aasaasi doontaa Guddiga Madax bannaan ee Xuduudaha iyo doorashooyinka Jubaland; taasoo loo tixraacayo Dastuurka, Gudigu waa inuu noqdaa dhexdhexaad ka madax bannaan laanta fulinta.

2. Guddigu wuxuu ka faa'iidaysan karaa: khubaro si ay baaritaanno iyo daraasaad u sameyso. Waxayna daabacaan khariidado sida kuwa doorashooyinka, tiro-koobka iyo maamulka ee Jubbaland.

3. Guddigu waa inuu baaritaan ku sameeyo is beddelka deegaanka, bulshada, siyaasadda, dhaqaalaha, waxayna kala shaqaynayaan dawladda Federaalka Arrimaha Xuduudaha.

4. Guddigu waa xor, dhexdhexaad wuxuuna matalaa dhammaan Jubbaland.

5. Guddiga Xuduudaha iyo Doorashooyinku waxa uu kala shaqayn doona, kalana xaajoon doonaa sidii la isu waafajin lahaa arrimaha maamulka iyo sharciga ee Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka, arrimahan waxaa ka mid noqon doona:

   a. Qaabka loo samaynayo liiska cod bixiyeyaasha, diiwaan gelinta codbixiyeyaasha, diiwaan gelinta musharraxiinta, iyo xallinta khilaafaadka sharciga doorashooyinka heer federaal.

   b. Aasaasidda degmooyinka doorashada ee Jubbaland oo dhan.

   c. Sugidda xuduudaha Jubbaland.

   d. Diiwaan gelinta axsaabta siyaasadda iyo magacaabista saraakiisha tirinta codadka doorashada ee heer federaal.

   e. Taageeridda doorashada madaxweynaha, Barlamaanka Jubbaland, iyo dawladaha hoose (inta Khadka guduudan la lalaalo Ayaan soo jeedinaynaa)

6. Waajibaadka kale ee guddigan waxaa ka mid ah:

   I. La shaqaynta khubaro sameeya baaritaanno iyo cilmi baaris ay ka ka mid yihin samaynta khariidadaha loo isticmaalayo doorashada, tirinta dadka iyo maamulka Jubbaland.

   II. Samaynta daraasado ku aaddan is beddelka ku yimaadda cimilada tirada dadweynaha ee degaanada

   III. Guddiga Xuduudaha iyo Doorashooyinka waxay ka koobanyihiin toddoba (7) xubnood oo uu magacaabayo madaxweynaha jubbaland, waxaana ansixinaya Baarlamaanka.

   IV. Xeer gaar ah ayaa nidaaminaya hawlaha iyo waajibaadka Guddiga Xuduudaha iyo Doorashooyinka.

Qodobka 87 aad:Soo Magacaabista Guddiyada Madaxa Bannaan

1. Guddiyada madaxa bannan waxaa soo magacaabayo Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Jubbaland.

2. Xubnaha ka mid noqonaya guddiyada iyo xafiisyada madaxa bannaan waa in ay soo maraan nidaam hufan oo si caddaalad ah loogu tartamayo, kuna salaysan aqoon maamu-leed iyo khibrad.

3. Waa inuu Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Jubbaland kormeeraa qaabka shaqaalaha xub-naha ka noqonaya guddiyada iyo xafiisyada madaxa bannan lagu soo xulayo.

Qodobka 88aad:Qaab Sharciyeedka Guddiyada Madaxa Bannaan

Barlamaanku waa inuu sameeyaa qaab sharciyeed lagu maamulayo guddiyada madaxa ban-naan.

## CUTUBKA 6aad: Xafiisyada Madaxa Bannaan

### Qodobka 89aad:Xafiiska Hanti Dhawrka Guud ee Jubbaland

1. Waa in uu jiraa Xafiiska Hanti Dhawrka Guud
2. Xafiiska Hanti Dhowrka Guud xaruntiisu waa caasimadda Jubbaland, wuxuuna ka shaqeey-naya dhammaan deegaannada kale Jubbaland oo dhan.
3. Hanti Dhawrka Guud magacaabistiisa iyo casilaaddiisa waxaa soo jeedinaya Golaha Wasiir-rada iyadoo loo marayo Baarlamaanka si ay u ansixiyaan.
4. Shuruudaha laga rabo Hanti Dhawrka Guud waa:
   a. Inuu yahay qof reer Jubbaland ah.
   b. In aysan da'diisu ka yareen 40 sano.
   c. In uu haysto shahaado heer jaamacadeed iyo aqoon xirfadeed oo cilmiga xisaabaadka iyo khibrad aan ka yarayn shan (5) sano.
5. Hawl wadeennada kale ee xafiiska Hanti Dhawrka waa in lagusoo xulaa si caddaalad ah oo daahfuran ayna kormeeraan xulistooda Guddiga Adeegga Shaqaalaha Rayidka ee Jubbaland.
6. Nidaamka iyo qaab maamuleedka Xafiiska Hanti Dhowka Guud waxaa lagu qeexi doona sharci gaar ah.

### Qodobka 90aad:Awoodaha iyo Masuuliyaadka Hanti Dhawrka Guud

1. Hanti Dhawrku wuxuu leeyahay awoodaha iyo masuuliyaadkan:
2. La dagaallanka musuqmaasuqa ee dhammaan hay'adaha dowlad goboleedka Jubbaland.
3. Kormeeridda dakhliga iyo kharashaadka ka baxa hay'adaha dowladda.
4. Hubinta in kharashaadku ay ku baxaan iyadoo la raacayo shuruucda miisaaniyadda Jubbal-and.
5. hubinta in kharashaadka baxaya loo isticmaalo sidii loogu qoondeeyey miisaaniyadda.
6. Kormeeridda hay'adaha Jubbaland,dawladaha hoose,hay'adaha madaxa bannaan iyo hay'ad kasta oo maareysa hantida dadweynaha iyadoo la raacayo qawaaniinta iyo qaab xisaabeedka Jubbaland.
7. Wuxuu hubiyaa ku takrifalka hantida dadweynaha ay maareeyaan shaqaalaha hay'adaha dawladda iyo kuwa caalamiga ah,
8. Ku soo rogidda ganaax lacageed ciddii lagu helo musuqmaasuq.Haddii baaritaannadu ay caddeeyaan in falal dembiyeed dhaceen, Hanti Dhawrku wuxuu u gudbinayaa kiiska Xeer Ilaalinta Guud si dacwad loogusoo oogo.

### Qodobka 91aad: Bangiga Jubbaland

1. Bangiga dhexe ee Dawlad Goboleedku waa hay'ad madax bannaan,wuxuuna masuul ka yahay:
   a. Qasnadda dawlad goboleedka Jubbaland
   b. Wuxuu kormeeraa bangiyada ganacsi iyo maaliyadeed ee ka hawlgala Jubbaland.
2. Bangiga waxaa agaasimaya toddoba (7) xubnood oo kala ah:
   a. Guddoomiyaha Bangiga.

b. Agaasimaha Guud ee wasaaradda maaliyadda.
c. 3 xubnood oo aqoon sare u leh arrimaha dhaqaalaha iyo maaliyadda.
d. 2 xubnood oo rugta ganacsigu soo magacaabayso.
e. Xubin kale oo aan codeyn karin oo laga soo magacaabayo Bangiga dhexe Jubbaland.

3. Guddoomiyaha bangiga dhexe Jubbaland waxaa soo magacaabaya Madaxweynaha Jubbaland Baarlamaankana wuu an sixinayaa.
4. Waxaa xilka lagaga qaadi karaa haddii uu jebiyo shuruucda Jubbaland.
Xilka qaadistiisa iyo magacabadiisa waa in barlamaanka laga ansixiyo.( waa la tirayaa )
5. Nidaamka maamulka ee bangigu ku shaqeynayo waxaa qeexi doona sharci gaar ah.
6. Xeer uu meelmarin doono Baarlamaanka Jubaland ayaa qeexi doona qaab dhismeedka, sharciga uu ku shaqanayo iyo waajibaadka Bangiga dhexe ee Jubaland.
7. Shuruucdaasi waxay aasaasi doonaan nidaamka maamulka maaliyadda ee Sanduuq Midaysan ee Bangiga dhexe Dawladda Jubaland.
8. Lacagaha soo gala ama loogu yabooho waxa ay ka mid noqonayaan Sanduuqa Midaysan ee Bangiga dhexe Dawladda Jubaland ,waa in lagu shubaa xisaab khaas ah oo ka furan Bangiga.
9. Waxaa reebban in laga saaro kharash Sanduuqa Midaysan ee Dawladda Jubaland. Waxaa Sanduuqa kharash looga saari karaa wareegto ka soo baxday Fulinta, uuna ansixiyay Barla-maanka Jubaland.

## Qodobka 92aad:Ciidamada Amniga ee Jubbaland

1. Ciidamada Dowlad Goboleedku waxay ka kooban yihiin:
   a. Ciidamada Booliiska.
   b. Ciidamada Asluubta iyo Xabsiyada.
   c. Ciidamada Sirdoonka.
   d. Ciidamada Daraawiishta.
   e. Ciidamada Ilaalada Xeebaha.
2. Xeer gaar ah ayaa qeexi doona qaab dhismeedka iyo masuuliyaadka dhammaan ciidama-da amniga.

## CUTUBKA 7aad: XIRIIRKA DAWLADDA DHEXE EE FEDERAALKA AH

### Qodobka 93aad:Xiriirka Dawlad Goboleedka Jubbaland iyo Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

Jubbaland waxay xubin ka tahay Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya.

1. Xiriirka ka dhexeeya Dowladda Federaalka ah iyo Jubbaland waxa hagaya cutubka shanaad (5) iyo (12) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.
2. Ilaa lagaa gaarayo heshiis qaran oo dhammaystiran oo dhex mara Dowlad Gobaleedka Jubbaland iyo Dowladda Federaaliga ah ee Soomaaliya, dhammaan khayraadka dabeeciga ah ee Jubbaland dhulkeeda laga helo waxa iska leh dadka reer Jubbaland,waxaana amaana ahaan ugu ilaalinaya Dowladda Jubbaland. Sidaas awgeed, maaraynta iyo maamulka dhammaan macdanta iyo khayraadka kale ee dabiiciga ah,baaridda iyo hurumarintooduba waa masuuliyad aasaasi ah oo Dowladda Jubbaland leedahay .Dowladda Jubaland kaliya ayaa iska leh awoodda bixinta rukhsadaha lagu baarayo,ama lagu hurumarinayo macdanta iyo khayraadka dabeeciga ah ee shidaalka,Dowladda Jubbaland ayaa masuul ka ah kormeerka horumarinta khayraadka Jubbaland.
3. Arrimahan soo socoda waxaa ka wada xaajoonaya Jubbaland iyo Dowladda Federaalka ah:
   a. Khayraadka dabiiciga ah
   b. Wadaagidda (Qaybsiga) dakhliga
   c. Dhawridda deegaanka
   d. Hiddaha iyo goobaha taariikhiga ah
   e. Kaabayaasha dhaqaalaha
   f. Ganacsiga dowlad goboleedyada ka dhexeeya
   g. Duurjoogta
4. Dawlad Goboleedka Jubbaland waxay mas'uul ka tahay:
   a. Waxbrashada iyo xannaanada carruurta.
   b. Caafimaadka iyo fayadhawrka guud iyo nadaafadda deegaanka.
   c. Horumarinta beeraha iyo xannaanada xoolaha.
   d. Bixinta shatiyada ganacsiga, ururinta canshuuraha iyo horumarinta ganacsiga yaryar iyo warshadaha.
   e. Dowladda hoose iyo guriyeynta.
   f. Ammaanka gudaha.
   g. Kaabayaasha dhaqaalaha.
   h. Khayraadka badda iyo badbaadada deegaanka.
   i. Dalxiiska.

### Qodobka 94aad: iskaashiga dawladdaha xubinta ka ah dowladda federaalka

1. Waxaa waajib ku ah in madaxweynayaasha dowladdaha xubinta ka ah dowladda federaalka soomaaliya iyo masuuliyiinta sare in ay yeeshaan kulamo joogto ama kaltan ay kaga wada xaajoodaan arrimaha deegaammadooda wada saameeya. oo ay kamid yihiin.
   a) Ilaha biyaha;

b) Beeraha;
c) Xanaanda xoolaha;
d) Daaqa iyo seeraysiinta;
e) Ladagaalanka nabaad guurka iyo ilaalinta deegaanka;
f) Caafimaadka;
g) Tacliinta;
h) Xiriirinta iyo wada xaajoodka hoggamiyeyaal dhaqameedka, ilaalinta iyo horumarinta xeer dhaqameedka;
i) Xiriirinta cullimada diinta iyo;
j) Dhalinyarada.
k) Iyo xuduudaha ay leeyihiin.

2. Dawladaha xubnaha ka ah dawladda federaalku dhexdooda ama xukuumadda federaalka waxay isla geli karaan heshiisyo iskaashi oo ay ku wada howl galaan, oo leh awood sharci, kana horimanayn dastuurka federaalka iyo kan Dawladdaha xubnaha ka ah dowladda federaalka.

Qodobka 95aad: Hay'adaha Dawladaha xubnaha ka ah Dawlada Federaalka.

1. Dhismaha laamaha sharcidejinta iyo fulinta dowlaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka waa arrimo lagu nidaaminaayo Dastuurada Dowlad Goboleedyada.
2. Jubbaland waxey awood buuxdo u leedahay in ay dhisato Hay'adaheeda Dastuuriga ah ee uu awood u siinayo Dastuurka Dowlad Goboleedka Jubbaland.

## CUTUBKA 8aad: Dhaqaalaha

### Qodobka 96aad: Hannaanka dhaqaalaha

Hanaanka dhaqaalaha ee jubbaland waa in dhammaan dadka jubbaland ay helaan nolol u qalanta karaamadooda baniaadaminimo iyo in qof kastaaa helo arrimaha lama huraanka ah, si waafaqsan mabaadiida caddaaladda bulshada.

### Qodobka 97aad: Dhaqaalaha suuqa xorta ah

1. hannaanka ganacsi ee jubbaland wuxuu ku salaysan yahay suuqa xorta ah, wuxuuna dhiirrigelinaya, isla markaasna dammaanad qaadayaa maalgashiga wadaniga ah iyo kan ajnabiga ahba.
2. Howlaha ganacsiga waxaa saldhig u ah tartanka xorta ah.
3. Sharciga ayaa dhiirrigelinaya, hagayana tartanka xorta ah iyo xakamaynta suuq-xirashada.
4. Siyaasada dhaqaalaha guud jubbaland waxaa haga habraaca maaliayadeed ee wasaaradda maaliyadda.

### Qodobka 98aad: kaalinta dhaqaalaha ee dowladda

1. Dowladdu waxay dhiirigelinaysaa horumarin dhaqaale oo joogtaysan, waxayna kaa shanaysaa dhaqaalaha gaarka loo leeyahay si kor loogu qaado wax soo saarka, kobcinta ganacsatada. Wax soo saarayasha yar-yar iyo iskaashatooyinka waxay yeelanayaan mudnaan gaar ah.
2. Dowladda ayaa ilaalinaysa kheyraadka dalka, waxayna damaanad qaadysaa in cid walba si sharciga waafaqsan oo joogtaysan uga faa'iidaysato.
3. Dowladda jubbaland waxay ilaalinaysaa awoodda wax gadashada ee dadweynaha, gaar ahaan kuwa danyarta ah.

### Qodobka 99aad xisaab xirka sannad-maaliyeedka guud ee Dowladda.

1. Xisaab xirka sannad-maaliyadeed kasta waa in wasaaradda maaliayada horgeyso ugu dambeyn 30ka bisha lixaad, ee sanadka xiga si uu uga dodo kadibna u ansixiyo ama u diido.
2. Hadii golaha wakiiladu diido xisaab xirka sanad maaliyadeedka waxaa waajib noqonaysa in uu goluhu ugudbiyo xafiiska xeer ilaaliyaha guud isagoo raacinaya sababihii lagu diiday, si uu baaris sharci ah usameeyo, ciddii mas'uuliyad ciqaabeed yeelatana sharciga u horgeeyo.

## CUTUBKA 9aad: Qodobbada Kama Danbaysta Ah

### Qodobka 100aad: Guddiga Dib u Eegista iyo Dhaqangelinta Dastuurka

1. Waa in la aasaasaa Guddiga Baarlamaaniga ah ee Dib u Eegista iyo Dhaqangelinta Dastuurka. Guddigu waxa uu dib u eegis ku samaynayaa dastuurka Jubbaland ee ay ansixiyeen ergadu.
2. Guddiga Dib u Eegista iyo Dhaqangelinta Dastuurku waxa ay
   a. Ka shaqeeyaan is waafajiyaan dastuurka Jubbaland iyo kan Dawladda Federaalka ee Soomaaliya.
   b. Guddigu waxa ay talo ka dalbi doonaan ururada bulshada rayidka ah, garsoorka iyo Golaha Fulinta
   c. Waxay adeegsadaan khubarada Soomaaliya joogta iyo meelaha kale ee caalamka dimuqraadiga ah.
   d. Guddigu waxa ay samayn doonaan talooyin ay u jeedin doonaan Barlamaanka Jubbaland. Kuwaas oo barlamaanku ka doodi doono uuna ansixin doono.
   e. Dastuurku wuxuu kaga baxayaa kumeel gaarka afti dadweyne.

### Qodobka101aad: Wax ka Beddelka Dastuurkan

1. Wax kabeddelidda dastuurkan waxaa soo jeedin kara:
   a. Afar meelood halmeel (1/4) Golaha Baarlamaanka.
   b. Golaha Wasiirrada
   c. Ugu yaraan 5,000 oo qof oo codbixiyeyaal ah.
2. Ka dib marka barlamaanka loo soo gudbiyo hindisaha wax ka beddelka dastuurka, waa in ay ka baaraan degaan Guddiga Dib u Eegista iyo Dhaqangelinta Dastuurku. Barlamaanka Jubbaland waa in uu ku ogolaadaa ka doodista hindisihii iyo talooyinkii ay soo gudbiyeen Guddigu cod hal dheeri ah (50%+1).
3. Barlamaanka Jubbaland waxa u samayn doonaa guddiyo baarlamaani ah oo dhageysta aragtida dhammaan dadka iyo ururada danaynaya.
4. Waa in dadka lagu wacyi geliyo barnaamij ku aaddan hindisaha wax bedelka distoorka. Taas oo uu qabanayo baarlamaanka Jubbaland si bulshada loo ogeysiiyo dhammaan wax ka beddelka lagu samaynayo Dastuurka Jubbaland.
5. Muddo aan ka yarayn bil Baarlamanka Jubbaland waa in cod u qaadaan hindisaha wax ka bedelka si baarlamaanku ugu ansixiyo aqlabiyadda 2/3 (seddex meelood laba meel) tirada guud ee xildhibaanada Jubbaland.
6. Wax ka beddelka dastuurka marka la ansixiyo waa in lagu daabacaa faafinta rasmiga ah, lagumana diidi karo diidmada qayaxan ee Madaxweynaha.

### Qodobka 102aad: Dhaqangelinta Dastuurka

1. Dastuurka Dawlad Goboleedka Jubbaland waa in si rasmi ah loo ansixiyaa ka dib marka loo qaado afti lagu xaqiijinayo ogolaanshaha reer Jubbaland. Aftidaasi waxa ay noqon kartaa mid guud ama mid ergo.
2. Muddada aftida Dastuurkani wuxuu dhaqangelayaa maalinta ay ansixiyaan Ergooyinkii

   Ansixinta Dastuurka.

## Qodobka 103aad: Kutakri falka awoodaha iyo Khiyaano Qaran

1. Qofkasta oo ku xad gudba Dastuurka Jubbaland ama u isticmaalaa awoodiisa masuuliyeed si baalmarsan shuruucda kale ee dalka u yaala waxaa loo aqoonsanayaa dembiile galay faldambiyeed culus oo uu ku muteeysanayo in lagaga qaado xasaanadda uu heysto lana marsiiyo shuruucda xeer ciqaabeed ee u yaala Dowlad Goboleedka Jubbaland.
2. Kicinta dadweynaha iyo isku dirka shacabka walaalaha ee wada dega jubblanad
3. Burburinta hay'adaha sharciga iyo kahor imaanshaha nidaamka dowlad goboledka jubbaland
4. Kamid noqoshaha ururada xagjirka iyo ushaqeynta Dawladdaha shisheeye
5. Faafinta sirta danaha jubbaland
6. Aflagaadeenta madaxweyaha iyo xukumadiisa
7. Kahor imaanshaha shareecada islaamka dastuurka jubbaland iyo xeerhoosaadka golaha.

## Qodobka 104aad: Aaya katashiga Jubbaland.

1. Hadii uu Dalka Soomaaliya galo xaalad amni daro ah iyo khalkhal siyaasadeed. Jubbaland waxey dib u fiirineysaa Dastuurkeeda waxeyna katashaneysaa aayaheeda si ay oga badbaado khal khal ka siyaasadeed.

## Qodobka 105aad: Mabaadi'da Dastuuradda

1. Mabda'iyan waa in la is waafajiyaa Dastuurka Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dastuurada Dowladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka.

2. Illaa inta laga gaarayo hashiis qaran oo loo dhanyahay oo wada ogal ah. Oo la isku keenayo dadkii soomaaliyeed ee kala irdhoobay. Jubbaland waxey isticmaaleysaa awoodaha uu siinayo Dastuurkeeda.

## Qodobka 106aad: magangalyad siyaasdeed iyo isu-celinta eedaysanayaasha /dambiilayaasha

1. Qofka shisheeyaha ah oo weydiista dowladda jubbaland magangelyo siyaasadeed waa la siin karaa, hadii uu buuxiyo shuruudaha magangelinta, iyada oo la tixgelinayo heshiisyada caalamiga ee aan ka hor imaanayn shareecada islaamka.
2. Waxaa reeban in muwaadin jubbaland ah, ama qof soomaali ah loo gacan geliyo dal kale.
3. Jubbaland way u gacan gelin kartaa dalkii uu ka soo baxsaday denbiile ama eedaysane shisheeye ah hadii uu jiro heshiis isu-celin oo u dhaxeeya jubbaland iyo dalka weydiistay celintiisa/celinteeda.
4. Qofna looma dhiibi karo arrimo siyaasadeed awgood.

Qodobka 107aad: xuquuqda shaqaalaha

1. Dowladdu waxay uxil saaran tahay shaqo-abuurista iyo tayeynta tababarada shaqaalaha.
2. Waxaa reeban shaqo khasab ah, hadii aan qaanuunku sikale u tilmaamin
3. Shaqaale kasta waxaa u xaq uleeyahay mushaar u dhigma shaqada uu qabto.
4. Shaqaale kasta waxa uu xaq uleeyahay maalim nasasho ah todobaadkiiba, fasax sannadeed, fasaxa ciidaha ee qaanuunku jideeyay. Haweenka waxaa intaas u dheer fasaxyada dhalmada iyo naas-nuujinta. Shaqaalaha fasaxa kujira waxba iskama dhimi maayaan xuquuqdooda mushaar.
5. Dowladdu waa in ay daryeeshaa shaqaalaha jir ahaan iyo damiir ahaanba.
6. Shaqaaluhu waxa ay xaq uleeyihiin in ay cabashadooda ku muujiyaan bannaanbax ama shaqo-joojin si xeerka waafaqsan. Ciidamada qalabka sida shaqa shaqa joojin ma samayn karaan.
7. Shaqaalaha iyo loo shaqeeyayashuba waxa ay xaq uleeyihiin in ay yeeshaan ururo maareeya una dooda danahooda.
8. Shaqaale kasta waxa uu xaq uleeyahay in uu doorto shaqada iyo loo shaqeeyaha uu doorbido.
9. Dhismaha, doorka iyo waajibaadka ururada shaqaalaha waxaa lagu qeexi doonaa xeer gaar ah.

Qodobka 108aad: Badbaadada shaqaalaha

1. Dowladda ayaa dejinaysa sharaciga shaqaalaha isla markaana samaynaysa samaynaysa hay'adaha dammaanad qaadaya xaqa howl gabka shaqaalaha gaarka ah iyo kan dowladdaba.
2. Qof kasta oo xil u haya dowladda oo ku dhaawacma, ku jirrada ama ku naafooba shaqada, waxa uu xaq uleeyahay daryeel qaanuunka waafaqsan.
3. Qof kasta oo dowladda u shaqeeya oo ku geeriyood howlgal, waxaa laga bixinayaa magdhow sharciga waa faqsan
4. xukuumaddu waxay shaqaalaha dowladda iyo kuwa gaaarka ahba u dejineysaa hab dammaanad-qaad shaqaale oo a maalgeliyaan dowladda, loo shaqeeyaha iyo shaqaaluhuba.

## Qodobka 109aad: Afti Dadweyne.


1. Hadii ay noqoto in laqaado afti uu amray dastuurka ama sharci kale ama sababo kale loo qaadayo, cidda hirgalinays aftidu waa in ay hubisaa in aftidu lagu hubiyo in dhammaan dadka cod bixin karaya ay fursad u ehelaan ay kumuujiyaan aragtidooda si xor ah, qarsoodina ah si waafaqsan sharci baarlamaanku ansixin doono kaasoo sugaya habraaca aftida.
2. Cidda hirgalinaysa aftidu waxay hubin doontaa in:
   a) Afftidu waa in ay uweydiisaa su'aashu si cad, hab loogu talagalay in lagu helo aragtida dhabta ah ee cod bixiyaha iyada oo aanay daah saarayn arimaha ay tahay in cod bixiyuhu kala doorto; iyo
   b) Waa in aysan su'aalaha qaabka loogu dhigay warqadaha codeynta iyo habraaca aftiduba aysan ku hogaaminayn cod-bixiyaha.

## Qodobka 110aad: Axdiga Ku Meel Gaarka ah ee Jubbaland

1. Dastuurkani waxa uu tirtirayaa Axdigii Ku Meel Gaarka ahaa ee Dawlad Goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

# LIFAAQYADA

JEDWALKA KOOWAAD: KHARIIRADA DAWLAD GOBALEEDKA JUBBALAND



JEDWALKA LABAAD: CALANKA DAWLAD GOBALEEDKA JUBBAL-AND



JEDWALKA SEDEXAAD: ASTAANTA DAWLAD GOBALEEDKA JUBBALAND

